# DARAASADDA AASAASIGA AH EE XAALADDA AY KU SHAQEEYAAN GABDHAHA SAXAFIYIINTA SOOMAALIYEED



Racwi Salad Muse oo war ka aqrineysa idaacadda Goal FM ee magaalada Muqdisho.

**Sawirka:** Farxiyo Kheyre

# Jadwalka Tusmada


**1 Soo koobid 4**

**2 IHordhac 9**

2.1 Asalka Macluumaadka aad 9

2.2 Ujeedada Daraasadda 9

2.3 Tusaale 9

**3 Mabaadi'da 11**

3.1 Sahanka 11

3.2 Wareysiyo Muhiim ah 12

3.3 Doodda kooxaha Diiradda 12

**4 Xaddididda daraasadda 13**

**5 Natiijooyinka Muhiimka ah 14**

5.1 Tirada ragga iyo dumarka ee heerka saxaafadda 14

5.2 Isbarbardhigga Jinsiga: Heerka Waxbarashada 15

5.3 Qaybinta jinsiga ee qaabdhismeedka ururka ee kaalinta warbaahinta 16

5.4 Shaqaalaynta 17

5.4.1. Siyaasadaha iyo hababka 17

5.4.2. Hannaanka shaqo-qorista 17

5.4.3. Xaqiraadda guusha haweenka 20

5.5 Isbarbardhigka Jinsiga ee ku Saabsan Heerarka Ka Qayb-Gelinta Shaqada 24

5.6 Soo koobidda xaaladaha nabadgelyada iyo amniga oo diiradda saaraya haweenka 25

5.6.1 Amniga iyo Nabadgelyada 25

5.6.2 Dhibaateynta galmada 30

5.7 Dareenka Jinsiga ee Heshiisyada Shaqada 31

5.8 Tababarrada Gaarka ah ee Jinsiga 36

5.9 Caqabadaha Dhaqanka 37

5.9.1 Aragtida Haweenka ee Xirfadaha Warbaahinta 37

**6 Gabagabo iyo Talooyin 38**

**7 Lifaaq 44**

# 1 Daraasadda Aasaasiga ah ee Xaaladaha Haweenka Saxaafadda Soomaaliyiya



*Racwi Salaad (Bidix) iyo Maxamed Axmed Jeelle (Midig) oo isla falanqeynaya suuqa kala iibsiga ciyaartoyda.*
***Sawirka:** Farxiyo Kheyre*

Daraasadda Aasaasiga ah ee Haweenka Suxufiyiinta Soomaliya waxaa la qabtey intii u dhaxaysay bilihii Sebtembar iyo Oktoobar 2016, iyada oo ujeeddadu tahay horumarinta fahamka xaaladaha haweenka suxufiyiinta Soomaaliyeed iyadoo loo marayo xogo wax ku ool ah oo la taaban karo. Waxaa bilaabay daraasaddan Ururka Saxafiyiinta Haweenka Soomaaliyeed (SWJ) oo kaashanaysa IMS-Fojo, iyadoo ayan jirin xog ururin dhexe oo ku saabsan xaaladaha haweenka ee xirfadda saxaafadda. Burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya kaddib iyo dadgaalkii sokeeyay ee muddada dheer socday wuxuu keenay dhibaatooyin farabadan oo raad ku yeeshay dhammaan kaabayaashii dalka oo ay ku jirto warbaahinta. Maaddaama Soomaaliya ay bilowday inay ka soo baxdo dagaalkii sokeeye, waxaa la gartay baahida loo qabo istiraatijiyadda horumarinta warbaahinta oo dhamaystiran iyo jinsiga inay tahay qayb muhiim ah oo ka mid ah habka dhismaha qaranka. Sidaa awgeed, daraasaddan waxaa loogu talagalay in lagu ogaado farqiga u dhexeeya jinsiga ee saameeya xaaladaha shaqada ee suxufiyiinta.

Daraasaddu waxay dooneysaa inay ka siiso daneeyayaasha muhiimka ah aragti cad oo ku saabsan xaaladda iyo inay u soo bandhigto jawaabaha ku aaddan isku dheelitir la'aanta jinsiga ee saxaafadda Soomaaliya.

Dhinacayda muhiimka ah ee baaritaanka waxaa ka mid ah saamiga dumarka iyo ragga ee saxaafadda, xilalka haweenka ee qaabdhismeedka ururrada, nabadgelyada iyo amniga saxafiyiinta (gaar ahaan haweenka), xaaladaha shaqada, nidaamka shaqaaleynta, ku qanacsanaanta shaqada, heerarka waxbarashada iyo tababarka , Iyo caqabadaha dhaqanka.

Daraasaddu waxay qiimeyneysaa siyaasadaha xasaasiga ah ee arrimaha warbaahinta, awoodda xirfadeed iyo xaddidnaanta suxufiyiinta, iyo farqiga jinsiga ee xirfadda guud.

Daraasaddan ayaa lagu fuliyay magaalooyinka caasimadaha afar gobol oo ka tirsan Soomaaliya: Muqdisho; Garoowe; Kismaayo; Iyo Baydhabo. Waxaa jira qiyaas ahaan 1,000 suxufi oo ka shaqeeya qeybaha Soomaaliya, 23% oo ka mid ah qiyaastaasna waxay yihiin haween. Waxaa jira qiyaastii 40 xarun warbaahineed, oo intooda badanna fadhigoodu yahay Muqdisho. Sidaa awgeed, 40% oo tijaabo ah ayaa laga soo sameeyay Muqdisho.

**Nidaamka daraasadda:** i) Daraasad ku saabsan saxafiyiinta dumarka iyo ragga; Ii) wareysiyo muhiim ah oo lala yeeshay milkiilayaasha / maamulayaasha xarumaha warbaahinta iyo ururrada warbaahinta; Iii) Kooxaha falanqaynta ee diiradda saara saxafiyiinta saddexda gobol.

Wadar ahaan 148 saxafi, oo 15% ka mid ah wadarta saxafiyiinta ayaa ka qaybqaatay daraasadda. Tijaabadu waxaa kaloo ka mid ahaa 19 warbixin oo muhiim ah oo ay la socdaan wareysiyo (15 xarun warbaahineed iyo 4 urur, goobtiiba 1 wareysi), iyo doodo gaar ah ee 8 kooxood - goobtiiba 2 dood.
4ta goobood oo ay daraasaddu ka kooban tahay waa: Muqdisho (caasimadda Soomaaliya), Garoowe (caasimadda gobolka Puntland), Baydhaba (caasimadda gobolka koonfur-galbeed), iyo magaalada Kismaayo (caasimadda gobolka Jubbaland).

## Natiijooyinka Muhiimka ah

Daraasaddu waxay ka qaadday, in guud ahaan, saxaafadda Soomaaliya ay ka hooseyso heerka 5aad ee horumarinta joogtada ah ee Qaramada Midoobey (SDG), si loo gaaro sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta haweenka.

Daraasaddu waxay muujineysaa in haddii xaaladaha hadda ee haweenka ee warbaahinta Soomaaliya aan laga hadlin, waddanku ma gaari doono himilooyinka horumarineed ee soo afjaraya dhammaan noocyada kala-takoorka jinsiga meel kasta.

**Wakiillada Jinsiga ee Shaqaalaha:** Dumarka Saxafiyiinta waxay ka dhigan yihiin qayb aad u yar oo ka mid ah kaalinta saxaafadda Soomaaliyeed 23%. Intaa waxaa dheer, daraasaddan ayaa waxa ay daboolka ka qaadday in, sida qaybo badan oo kale haweenku uga yaryihiin ragga markii loo eego xilalka saamaynta leh. Haweenku waxay leeyihiin matalaad xaddidan markii la eego go`aan qaadashada dhismayaasha xarumaha warbaahinta.

Celcelis 423 suxufi oo ka shaqeya 15 xarun warbaahineed oo la booqdey, keliya 92 (22%) waa dheddig. Celcelis waxaa jira 9 xubnood oo ka mid ah shaqaalaha, laba ka mid ah waxay yihiin haween halka inta kale ay yihiin rag. Jagooyinka sare ee maamulka, 14% waa dumar, halka 38% ay yihiin rag.

**Heerarka Waxbarashada:** Daraasadu waxay daboolka ka qaadday in haweenku iyagoo horayba u liitay ay soo galaan xirfadda, taasoo ay ugu wacantahay heerarka waxbarasho marka la barbardhigo tan ragga. Natiijooyinku waxay muujinayaan in ragga saxafiyiinta ah ee warbaahinta Soomaaliyeed ay ka aqoon badan yihiin dumarka: 99% raggu waxay waxbarashadoodu gaarsiisan tahay heer dugsi sare ama heer jaamacadeed marka loo eego 95% dumarka. Inta badan dumarka (57%) kaliya ayaa wax ka bartay ilaa dugsig sare, halka 63% raggu ay dhammeeyeen jaamacad. Taasaana keeneysa iney raggu hore u socdaan oo xagga sare ka galaan jagooyinka haweenkuna ay ku haraan halka hoose markii la eego qaabka dhismaha hay`adaha. Daraasaddan ayaa sidoo kale shaaca ka qaadday aragtida ah in haweenku ayan lahayn awood ay ku dhammaystiraan hawlaha waajibaadka loo diro, taasoo laga yaabo iney ugu wacan tahay heerarkooda waxbarashada oo hooseeysa.

**Nidaamka Dareenka Jinsiga iyo Habsocodka:** Inta badan, xarumaha warbaahinta Soomaaliyeed ma aysan qorin xeerar shaqo-qoris ama nidaamyo.

Waxbarashada, xirfadaha, iyo khibradda ayaa ah shuruudaha shaqo-qorista guud ahaan la aqbalo. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in shaqaalaha lagu doorto waxyaabo ku salaysan qaraabo ama xiriirro shakhsi ahaaneed oo kale.

Natiijooyinka ayaa sidoo kale muujinaya in shaqaalaha maamulka, iyo qaar ka mid ah milkiilayaasha, ay leeyihiin go`aanka kama dambeysta ah ee qorista. Guddiyada shaqo-qorista waa mid dhif iyo naadir ah, si aan loogaba hadlin u sinnaanshaha shaqada labada jinsi.

**Heshiiska:** Hab-hoosaadka waxaa loo adeegsadaa shaqo-qorista, iyada oo aan la siinayn tixgelin baahiyaha kala duwan ee haweenka iyo ragga. Maqnaanshaha habraac cad oo ku salaysan nidaamka shaqo-qorisata ee rugaha wararka Soomaalida waxay ka dhigan tahay 45% jawaab bixiyayaasha, oo ay ku jiraan 46% dumarka, ma haystaan heshiisyo shaqo oo adag. Maamulayaasha xarumaha warbaahinta ayaa xaqiijiyay arrintan, iyo haddii uu yimaad isku dhac, ma jiraan nidaamyo cabasho oo muuqda oo meesha yaal.

**Ku qanacsanaanta Shaqada:** Inta badan suxufiyiinta, 89% (oo ka mid ah wadarta 148 qof), ayaa sheegay in ay ku qanacsan yihiin shaqadooda. Maamul-wanaag, ixtiraam, bey'ad shaqo oo wanaagsan, wadashaqayn wanaagsan, iyo rajooyinka koritaanka ayaa ka mid ah sababaha la sheegay. Si kastaba ha noqotee, dumar ka badan ragga ayaa la sheegay ineyan qanacsanayn, taasoo ay ugu wacan tahay ' caddaalad-darro ' ka timaadda maamulka. Maqnaanshaha nidaamyada ku habboon cabashada, fursadaha horumarinta xirfadaha iyo faraqa u dhexeeya mushaarka ayaa ka mid ah sababaha ugu badan ee ay suxufiyiintu uga tageen shaqada. 57% oo ka mid ah jawaab bixiyayaashu waxay ka tageen ugu yaraan 1 xarun warbaahineed intii lagu guda jiray 2dii sano ee hore. Waxaa xusid mudan, rag badan (62%, n = 35) marka loo eego haweenka ayaa shaqada laga cayriyay labadii sano ee la soo dhaafay sababo ay ka mid yihin: karti-xumo iyo caajisnimo, inkastoo uu heerkooda aqooneed uu sarreeyay. Daraasadu waxay muujineysaa in haweenka badankoodu aysan ka tagin shaqada waase la eryay, waxayna u baahdeen iney raadsadaan shaqooyin kale oo ka fiican.

**Badbaadada iyo Amniga:** Amniga ayaa walaac weyn ku haya dhamaan saxafiyiinta Soomaaliyeed, gaar ahaan Muqdisho iyo Baydhaba.

Khatarta amnigu waxay ugu daran tahay inta ay ku sugan yihiin goobta shaqadooda maalinlaha ah, maadaama si sahlan loo bar-tilmaamaysan karo ama loo aqoonsan karo saxafiyiin. Caqabadaha guud ee wajaha saxafiyiinta waxaa ka mid ah dhimasho, xirig, iyo weerarro. Ma jiraan asaas ahaan hab iyo qalab loo isticmaalo badbaado iyo difaac, iyadoo aanba laga hadlayn midda jinsiga ee gaarka ah. Inta badan saxafiyiinta Soomaaliyeed (78% n = 115, Dh= 49, L = 66) ayaa sheegay in ay yihiin kuwa nugul, inkasta uu maamulku sheeganayo inuu bixiyo macluumaad asaasi ah oo ku saabsan wacyigelinta ammaanka iyo tababarka adegyada. Tallaabooyinka ka-jawaab-celinta ee dhacdooyinka amniga ee lagu tilmaamay daraasaddan looma arkin in si ku filan loo xoojiyay.
Dhibaateynta Galmada: Mid ka mid ah guusha gaarka ah ee daraasaddan waxay tahay in la helo jawaab-celin ku saabsan dhibaataynta galmada iyada oo loo marayo xogwareysi saddexaad ah. Sida badan mowduucyada xasaasiga ah sida Xad-gudubka galmada maaha mawduuc furan oo laga doodi karo Afrika. 13% waxay dareemaan raaxo ku filan in ay sheegaan in lagu xadgubay oo lagu galmoodey, ha noqdeen shaqooyinkooda hadda ama hore. 20% jawaab bixiyayaasha (28% haweenka) ayaa sheegay inayan waxba samayn doonin haddii lagu dhibo, iyagoo u baqaya amnigooda iyo shaqadooda. Ma jiraan habab xooggan oo looga jawaabayo ku dhibaateynta galmada ee kaalinta warbaahinta.

**Wacyigelinta dhaqameed:** Daraasadda ayaa shaacisay guud ahaan isku celcelis (88%) ee warbaahinta Soomaaliya in dumarku ay ka qaybqaadan karaan xirfadda warbaahinta. Jawaab aad u yar (12%) ayaa muujisay aragtida xun ee fikradaha haweenka ee xirfadda warbaahinta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira wali raadinta aragtida ah in saxaafaddu aanay ahayn "xirfad ku habboon" haweenka. Maamulayaasha warbaahinta (26%) waxay muujiyeen rabitaankooda ah inay arkaan haween badan oo xirfaddan leh, laakiin tani ma aysan ka muuqan xushmad dhab ah. Sii wadista ***quursiga khibradda haweenka,*** oo xaddidaysa ka qaybgalka haweenka jagooyinka yar-yar, waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ka soo baxdo fikradaha aan tooska ahayn ee waalidka.

**Tababbarka ragga iyo dumarka:** Daraasaddu waxay caddaysay farqi cad. Inta badan jawaabeyaasha (74%) waxay tilmaameen in aanay helin ama horeba u helin tababar ku saabasan waayo-aragnimadooda xirfadeed.

**Tababarka Jinsiga:** Daraasaddu waxay qeexday iney tani tahay farqi cad. (74%) waxay tilmaameen in aysan qabin waxa tababar ah oo gaar ah oo ku saabsan khibradooda shaqo, hore iyo kaddib. Tababarka jinsiga ee gaarka ah wuxuu barayayaa saxafiyiinta iyo dadka ka shaqeeya warbaahinta heerka habdhaqanka xasaasiga ah ee jinsiga, taasoo kor u qaadeysa wacyigelinta takoorka jinsiga. Jinsiga aqoonta leh ee ka shaqeeya warbaahinta waxay u badantahay inu soo saaro agab kala geddisan, dhamaystiran isuna dheellitiran.



## Talooyin

- Iyadoo laga shidaal qaadanayo natiijooyinka kor ku xusan, talooyinka soo socda ayaa laga yaabaa in lagu dabbaqi karo daneeyayaasha kala duwan oo ay ka mid yihiin dawladda, bulshada rayidka ah iyo ururrada horumarinta warbaahinta, iyo kuwo kale.
- Daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin xukuumadda, bulshada rayidka ah iyo warbaahinta, waa in ay qaadaan tallaabooyin ay kaga hadlayaan liididda haweenka ka shaqeeya saxaafadda si ay u awooddo warbaahinta Soomaaliyeed iney hormariso, dhistana warbaahin salkeedu yahay dimoqoraaddiyad sida sinaanta jinsiga iyo kala duwanaanshaha. Shaqaale warbaahineed oo isu-dheellitiran oo rag iyo dumarba leh ayaa soo saari kara macluumaad badan oo faaiido leh, waxay bixiyaan aragtiyo badan oo kala duwan, waxay suurtageliyaan in la helo dhagaystayaal ballaaran, inay soo geliyaan dakhli dheeri ah iyo inay noqdaan kuwo ka sarreeya marka loo eego midka ragga oo keliya u afduuban.
- Taageero wax ku ool ah in la siiyo haweenka si ay u horumariyaan xirfadaha saxafinnimada ayaa noqon karta hab lagu hagaajiyo shaqadooda. Tani waxay qaadan kartaa kaalinta ama qaabka deeqda waxbarasho, iyada oo waxbarasha la'aantu tahay caqabad.
- Waa in la qaadaa tallaabooyin macquul ah / ficil ah si loo hubiyo in warbaahintu ay qaadato haween badan.
- Kor u qaadidda wacyiga, go'aan qaadashada oo dhan iyo kordhinta fikradaha haweenka ee warbaahinta waa tallaabooyin kale oo suurtagal ah.
- Tallaabooyinka kale ee suurtogalka ah waxaa ka mid ah kordhinta wacyiga qiimaha go'aaminta dhamaystiran iyo ballaarinta aragtida haweenka ee doorka warbaahinta. Milkiilayaasha warbaahinta iyo maamulayaashu waa inay fahmaan Soo-celinta Maal-gashiga (ROI) ee is-dhex-galka iyo kala-duwanaanta fikirka ee hoggaanka qaab-dhismeedkooda.
- Furitaanka doodaha arrimaha jinsiga iyo warbaahinta iyadoo loo marayo shirarka quraacda, doodaha naadiyada iyo / ama warbixinnada hoggaamiyeyaasha warbaahinta ayaa sidoo kale fududeeya isbedelka maskaxeed, taas oo ka dhigaysa habka loogu talagalay go'aaminta xasaasiga ah ee jinsiga ee warbaahinta.
- Daneeyayaashu waxay si kel-keli ah amaba iskaashi ahaan u siin karaan haweenka kaalmo ay wax ku bartaan, taasoo u sahlaysa iney haweenku gaaraan heerarka ugu sarreeya ee waxbarashada.
- Xarumaha warbaahintu waa inay sidoo kale joojiyaan takoorka haweenka oo ku saleysan waxbarashadooda, taas beddelkeedna waa iney ku dhiirrigeliyaan haweenka iney wataan waxbarashadooda inta ay shaqeynayaan ama ay xarumahu siiyaan tababar-shaqo si ay u gaaraan sinnaanta heerarka waxbarashada ee u dhexeeya labada jinsi.
- Taageeridda awoodda hay'adeed iyo ka qayb-qaadashada maareeynta warbaahinta / milkiilayaasha si loo horumariyo siyaasadaha shaqo-wadaagga iyo siyaasadaha kale ee hab-nidaameedka jinsiga: tan waxaa lagu sameyn karaa gudaha oo lagu saleeyaa xarumaha warbaahinta gaarka ah. Nidaamyadu waa inay soo bandhigaan guddiyada shaqaaleysiinta, oo ay ku jiraan ballamada jinsiga iyo ballamada wanaagsan ee haweenka ee ku jira kaalimaha muhiimka ah. Ururradu waxay sidoo kale horumarin karaan hab-dhaqameedka anshaxa xubinnimada iyo horumarinta nidaamyada guud ee lagu habeyn karo kaalinta warbaahinta gaar ahaaneed sida ugu habboon.
- Hanuunin suxufiyiinta haweenka da`yarta ah si loogu diyaariyo kaalimaha hoggaamineed.
- Taageeridda qorshaha iyo hawlgalka nabadgelyada iyo amniga ee wax ka qabashada baahida haweenka iyo ragga labadaba, si loo hubiyo in qaababka ka hortagga iyo ka jawaabidda si buuxda looga heli karo dhammaan xarumaha warbaahinta.
- Wacyi-gelinta ururku waa lagama maarmaan in si waxtar leh wax looga qabto handadaadda-galmo.
- Taageeridda horumarinta iyo kobcinta sharciyada qasbidda galmada iyo / ama sharciyada jinsiga oo ay ka mid yihiin hababka tacaddiyada galmada. Dhammaan xarumaha warbaahintu waa inay sameeyaan

hab xisaabtan si loo hubiyo in dhammaan sharciyada urureed la hirgaliyo loona hogaansamo, iyo in si xoog leh jawaab looga bixiyo xadgudub kasta. Tallaabooyinkan waa inay ku jiraan habka warbixinta ee tixgelinaya baahida dhibbanaha iyo eedaysanaha labadaba, waana in sidoo kale ku jiraan qaababkaas taageerada dhaqanka isbedelka ee dembiileyaasha.

- Taageeridda qiimeynta sharciyada iyo nidaamyada gaar ahaaneed si loo qiimeeyo baahida loo qabo dhismeyaal dheeraad ah.
- Taageeridda horumarinta siyaasad hufan oo muuqata; Dhammaan shaqaalaha waa iney ka warqabaan xaaladahaas (sharciyadaas).
- Taageeroidda tababbarka asaasiga ah, xasaasiganana ah oo loogu talagalay saxafiyiinta gudaha ama dibedda, oo ay ku qaadanayaan siminaarro isku dhafan.
- Taageeridda tababar loogu talagalay maamulka dhexe iyo maamulka sare oo ku saabsan fikradda ballaaran ee jinsiga iyo qaybaha qiimihiisa dheeraadka ah.

# 2 Hordac



*Fadumo Abukar (Midig) ayaa Xafsa Khalif (Bidix xigta wareysi kula yeelaneysa xarunta Idaacadda Kulmiye.* ***Sawirka:*** *Farxiyo Kheyre*

## 2.1 Guudmarka

Daraasada aasaasiga ah ee ku saabsan xaaladaha shaqada haweenka ee saxaafadda waxaa soo saaray Ururka Haweenka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (SWJ) iyada oo lala kaashanayo IMS-Fojo. Daraasaddani waxay ka dhalatay walaaca SWJ ee ku saabsan xog la'aanta xaaladaha jinsiga ee shaqada saxafiyiinta.

Tan iyo 1991kii, colaadaha joogtada ah waxay keeneen burburkii hay'adaha dawladda, kala qaybsanaanta siyaasadeed, fara-xumeyn baahsan, barakac, nabadgelyo darro iyo caqabado kale oo joogto noqday.

Hay'adaha warbaahinta ayay iyaguna sidaasoo kale dhibaatooyinkaas soo gaareen. Si loo helo taageero ku filan horumarinta warbaahinta Soomaaliya, waxaa baahi loo qabaa jaho istaraatiijiyeed oo diiradda saara baaritaan ballaaran oo salka ku haysa xaaladaha shaqo ee saxafiyiinta xarumaha warbaahinta. Intii lagu gudajiray hawlgalka daraasaddan aasaasiga ah, SWJ iyo la-hawlgalayaasheeda waxay isla garteen in horumarinta qaybaha warbaahinta Soomaaliyeed inay maanka ku hayaan inay tixgeliyaan qaybaha muhiimka ah oo ka mid ah dhismayaasha, sida dheelitirnaanta jinsiga.

Isla-hawlgalayaashu waxay ku heshiiyeen in aragtida jinisga lagu sharxi doono doodo ku saabsan qodobbada takoorka tooska ah iyo kuwa aan tooska ahayn ee xaddidaya horumarka haweenka ee xirfadda

**Warbaahinta:** Tani waa daraasaddii koowaad oo dhamaystiran oo diiradda saareysa fahamka iyo dib-u habaynta arrimaha jinsiga ee ku saabsan xaaladaha shaqada ee qaybta warbaahinta Soomaaliyeed. Ilaa iyo haddana ma jirto daraasad la mid ah dalka oo dhan oo ay sameeyeen hay`ado xirafadlayaal ah.

## 2.2 Ujeedada Daraasadda

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee daraasaddan waa:
Ogaansho xaaladda saxafiyiinta haweenka ee Soomaaliya.
Xaddidid mowduucyada iyo meelaha xiisaha u leh haweenka saxafiyiinta Soomaaliya. In la soo saaro talooyin lagu hagaajinayo xaaladda saxafiyiinta dumarka Soomaaliyeed.

## 2.3 Tusaale

Waxaa jira qiyaastii 1000 suxufi oo ka shaqeeya Puntland iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, 230 (23%) waxay aaminsan yihiin

in ay yihiin haween, waxay shaqaale ka yihiin 40 xarun warbaahineed oo u badan FM-yada. Qaar ka mid ah saxafiyiintaasi waxay sidoo kale u shaqeeyaan sidii shaqaale xor ah oo dheeri ku ah shaqaalaha.

Si loo hubiyo in daraasaddu ay tahay mid asiibtay suurtagalnimada ujeeddada loo sameeyey, waxaa la sameeyay kormeer, taasoo keentay xulashada goobo gaar ah. Qodobbada tirada ee tusaalahan waxaa lagu dabbaqay haweenka, goobta, nooca warbaahinta, iyo qaababka (oo ay ku jiraan qaababka ururinta xogta daraasadda). Qaybinta saamigana waa sida soo socota:

- **Goobaha -** afar caasimad-goboleed oo waawayn ayaa diiradda la saaray, sida: Muqdisho, Garowe, Kismaayo, iyo Baydhabo.
- **Sahan -** 150 saxafi (15% qiyaasta wadarta guud ee tirada saxafiyiinta dalka) ayaa laga soo xushay goobahaas. Maadaama Muqdisho ay tahay magaalada ugu weyn, tirada ugu badan iyadaa laga soo qaatay. Sidaas darteed 60 saxafi oo Muqdisho jooga, 30 Garoowe ah, 30 ku nool Kismaayo, iyo 30 Baydhabo ah.
- **Wareysiyada muhiimka ah ee daneeyayaasha:** 10 Wareysi oo muhiim ayaa lagu qabtay Muqdisho. Mid ka mid ah kuwan wuxuu ahaa xubin ka tirsan Urur Saxaafadeed, inta soo hartayna waxay ahaayeen koox ka socotay maamulka xarumaha warbaahinta. Goobaha soo haray, 3 ayaa la wareystay (2 waxaa lala yeeshay maamulka xarumaha warbaahinta iyo 1 qof oo wakiil ka ah Urur Saxaafadeed).
- **Doodda kooxda diiradda** * Dhammaan goobaha, 2 DKD ayaa la qaban doonaa, hal dood waxaa loo qabanayaa ragga, midna dumarka. Tiro siman oo haweenka ah iyo rag saxafiyiin ah ayaa lagu beegsaday.



# 3 Mabaadi'da



*Racwi Salad Muse oo war ka aqrineysa idaacadda Goal FM ee magaalada Muqdisho.* ***Sawirka:*** *Farxiyo Kheyre*

Kulan aqoon-isweydaarsi ayaa lagu qabtay Muqdisho bishii Agoosto 2016kii waxaa laysugu keenay IMS-FOJO, SWJ, iyo koox farsamo oo la taliyayaal ah. Aqoon-is-weydaarsiga ayaa adeegsaday habka biyo-dhaca. Sameynta qorshe fulin dhamaystiran , oo ay ku jiraan xulashada hababka habboon iyo saamiga. Shaxdan hoose waxay qeexaysaa hababka la isku waafaqay iyo cabbirka tusaalaha ah ee loo soo jeediyay hab kasta.

| Goob | # Wareysi/ Su'aalo-waydiin | # WWM | # DKD |
|---|---|---|---|
| Muqdisho | 60 | 10 | 2 |
| Garowe | 30 | 3 | 2 |
| Kismaayo | 30 | 3 | 2 |
| Baydhaba | 30 | 3 | 2 |
| **Wadar** | **150** | **19** | **8** |

## 3.1 Sahan

Shaxda 1 - Sahaminta Shakhsi ahaan ee lagu beegsanayo saxafiyiinta joogtada ah

| Goob | Dheddig | Lab | Tirada Su'aalo-waydiinta |
|---|---|---|---|
| Baydhaba | 8 | 22 | 30 |
| Garowe | 11 | 19 | 30 |
| Kismaayo | 10 | 17 | 27 |
| Muqdisho | 32 | 29 | 61 |
| **Wadar** | **61** | **87** | **148** |
| **%** | **41%** | **59%** | **100%** |

## 3.2 Wareysiyo Muhiim ah

Shax 2 – Wareysiyo Muhiim ah

| Goob | Dheddig | Lab | Tirada Su'aalo-waydiinta |
|---|---|---|---|
| Baidoa | 0 | 3 | 3 |
| Garowe | 0 | 3 | 3 |
| Kismayo | 0 | 3 | 3 |
| Mogadishu | 0 | 10 | 10 |
| **Wadar** | **0** | **19** | **19** |
| **%** | **0%** | **100%** | **100%** |

Shax 3 – Nooca Xarunta Warbaahinta

| Nooca Ururka | Baydhaba | Garowe | Kismaayo | Muqdisho | Wadar Guud |
|---|---|---|---|---|---|
| Association | 1 | 1 | 1 | 1 | 4 |
| FM Radio | 2 | 2 | 1 | 9 | 14 |
| TV | | | **1** | | 1 |
| **Wadar Guud** | **3** | **3** | **3** | **10** | **19** |

## 3.3 Doodda Koox Diiradda

Shax 4 – Qaabdhismeedka Koox Diiradda

| Goob | # ee DKD | Dheddig | Lab | Wadar |
|---|---|---|---|---|
| Baydhaba | 1 | 5 | 5 | 10 |
| Garowe | 1 | 5 | 5 | 10 |
| Kismaayo | 1 | 5 | 5 | 10 |
| Muqdisho | 1 | 5 | 5 | 10 |
| **Wadar** | **4** | **20** | **20** | **40** |
| **%** | | **50%** | **50%** | **100%** |



# 4 Xaddidaadaha daraasaddda



*Wariye Shukri Aadam oo warka ka aqrineysa idaacadda Goobjoog ee Magaalada Muqdisho.* ***Sawirka:*** *Farxiyo Kheyre*

**4.1 Caqabadaha Luqadda:** Qalabka iyo qaababka daraasadda oo dhan ayaa lagu sameeyey Ingiriis, hase ahaatee ururinta xogta waa in lagu sameeyo Soomaliga. Sidaa darteed, waxaa loo baahday dib loogu noqdo tarjumaad taasoo keentay khalkhalka habsani u socodka falanqaynta xogta.

**4.2 Dib u dhacyada shaqada goobta:** Shaqada goobtu waxay socotay qiyaas ahaan 4 asbuuc ilaa 2 sida hore loo qorsheeyay. Tani waxay saameeysay marxaladaha xiga ee daraasadda, xaddidaadda waqtiga loo heli karo falanqaynta xogta iyo ka shaqaynteeda.

**4.3 Arrimaha tayada xogta:** Guud ahaan, tayada xogta ma ahayn heerkii laga rabay, gaar ahaan qaybaha tayada. Waxaa jiray cidhiidhi in jawaab-celiyeyaashu aan si sax ah loo fahmin. Faahfaahin yar ayaa laga qabtay doodaha kooxaka diiradda, ugu yaraan marka la eego macluumaadka la geliyey xogta. Tani waxay keentay in dib u dhigista nidaamka nadiifinta iyo kala shaandhaynta xogta, sababtoo ah shaqo weyn ayaa loo baahnaa si loo soo saaro macluumaad la isticmaali karo. Xaddidaadda kale waxay ahayd qaladka in la tirtiro amaba la baabi`iyo, taasoo habsocodkii uruurinta macluumaadka aan la haynin xogtooda, loona diray wariye kasta. Tani waxay ballaarin kartaa aragtida daraasadda ee ku saabsan jagooyinka haweenka ee qolalka wararka marka ragga loo eego.

**4.4 Waqtiga la siiyay** ee loo dhaafay socodsiinta iyo falanqaynta xogta ma ahayn mid ku filan, taasoo ay ku jiraan cadaadiska hawalaha dib u eegista iyo horuumarinta daraasadda dhammaanteed.

# 5 Natiijooyinka Muhiimka ah



*Khadra Cabdi Cali oo war ka aqrineysa Istuudiyaha Muuqbaahiyaha Universal ee magaalada Muqdisho. Sawirka: Farxiyo Kheyre*

## 5.1 Xiriirka lab iyo dheddig ee saxaafadda

Haweenku si aad ah ugama muuqdaan warbaahinta Soomaaliyeed, kuwaa oo ka hooseeya 50% saxafiyiinta ka shaqeeya afarta magaalo oo kala ah: Baydhaba, Muqdisho, Garoowe iyo Kismaayo. Xogta hoos ku qoran waxay muujinaysaa farqigaas.

Shax 5 - Meeqa saxafi ayaa jooga xarunta warbaahintaada?

| Goob | Lab | Dheddig | Wadar |
|---|---|---|---|
| Baydhaba | 5 | 25 | 30 |
| Garowe | 6 | 11 | 17 |
| Kismaayo | 10 | 46 | 46 |
| Muqdisho | 71 | 259 | 330 |
| **Wadar** | **92** | **331** | **423** |

Shax 6

| Goob | Lab | Dheddig |
|---|---|---|
| Baydhaba | 17% | 83% |
| Garowe | 35% | 65% |
| Kismaayo | 22% | 78% |
| Muqdisho | 22% | 78% |
| **Wadar** | **22%** | **78%** |



## Kalaqaybin jinsiga

Jaantus 1




Macluumaadka laga soo ururiyay maamulka sare ee 15 xarun warbaahineed oo ku yaalla 4-ta bartilmaameed ayaa sheegay in haweenku ay ka yar yihiin rubuc (22%) saxafiyiinta ka shaqeeya dalka. Qiyaas ahaan 423 shaqaale ah oo hadda ka shaqeeya 15 goobood oo warbaahineed oo la booqdey, keliya 92 ayaa dumar ah. Intaa waxaa dheer, inkasta oo ay jiraan dadaallo lagu wareystay tiro isku mid ah oo isugu jira rag iyo haween saxafiyiin ah oo ka tirsan qeybta sahanka ayay daraasaddan kaliya waxay awoodday in ay hesho oo ay la xiriirto 41:59 haween iyo rag. Sida laga soo xigtay kooxaha diiradda, waxay sheegeen in hoos-u-dhigga haweenka saxaafadda loo aaneyn karo saddex arrimood oo waaweyn:

- In yar ama aan daneynin xirfadda;
- Heerarka hoose ee waxbarashada marka la barbar dhigo ragga, oo u diidaya haweenka inay soo galaan xirfada;
- Takoorka ka dhanka ah dumarka - inkastoo arrintani aan loo maleyneynin inay si gaar ah micno u leedahay, haddana weli waxaa socdo doodo kala geddisan, sida aad hoos muuqata:

## 5.2 Isbarbardhigga jinsiga: heerka waxbarashada

Jaantus 7 - Isbarbardhigga ragga iyo dumarka: heerka waxbarashada

| Goob | Heerka Waxbarashada | Noq Dheddig | Noq Lab | Noq Wadar |
|---|---|---|---|---|
| Baydhaba | Hoose | 1 | 1 | 2 |
| | Sare | 6 | 13 | 19 |
| | Jaamacad | 1 | 8 | 9 |
| **Baydhaba Wadar** | | **8** | **22** | **30** |
| Garowe | Hosse | 1 | | 1 |
| | Sare | 7 | 2 | 9 |
| **Garowe Wadar** | | **11** | **19** | **30** |
| Kismaayo | Hoose | 9 | 11 | 20 |
| | Jaamacad | 1 | 6 | 7 |
| **Kismaayo Wadar** | | **10** | **17** | **27** |
| Muqdisho | Hoose | 1 | | 1 |
| | Sare | 13 | 5 | 18 |
| | Jaamacad | 18 | 24 | 42 |
| **Muqdisho Wadar** | | **32** | **29** | **61** |
| **Noq Wadar Sahan** | | **61** | **87** | **148** |

Jaantus 2: Dumarka iyo raga heerarka waxbarasho – Sahan




Xogta laga helay daraasadda ayaa muujinaysa in ragga suxufiyiinta ah ay u muuqdaan kuwo aad u sarreey marka loo eego gabdhaha. Jaantusyada 3 iyo 4 ayaa muujinaya in keliya 37% (n = 32) ragga aan dhigan jaamacad. Marka la eego farqiga, 62% (n = 38) ee haweenku ayan gaarsiisnay heer jaamacadeed.

Awoodda ay haweenku u leeyihiin helitaanka waxbarashada oo xaddidan awgeed baa waxay halis u tahay iney la kulmaan takoor, taasoo ay waxbarashadu qayb ka tahay shuruudaha shaqo-qorista. Heerka sinnaan la'aanta jinsiga ayaa wuxuu ka sii socodaa qaab-dhismeedka qolalka wararka, iyada oo inta badan ay xaddidan tahay go'aan-qaadashada haweenka.. Natiijadan waxaa lagu muujiyey shaxda hoose. Haweenku waxay si aad ah ugu yaryihiin 50% go'aan qaadashada xarumaha warbaahinta Soomaaliyeed. Kaliya 36 ka mid ah 157 maareeye ayaa ah haweenka ku nool afarta magaalo oo kala: Garoowe, Kismaayo, Muqdisho, iyo Baydhabo. Laga bilaabo 17ka warbaahin ee ka qaybgalay daraasaddan, ayaa 5 haween ah oo keliya soo qabtay xilalka sare ee maamulka, halka 46 ay ahaayeen rag. Maaraynta maamulka dhexe, 14 keliya oo ka mid ah 40 ayaa ahaa haween; maamulka hawlgalka, 17 ka mid ah 49 maamule ayaa ahaa haween. Xaqiiqda ah in haween badan laga helay qaybta hoose ee awooda qolalka wararka waxay muujinaysaa jiritaanka quursiga oo si nidaam ahaan ah uga soo horjeeda go'aan qaadashada haweenka. Inta badan waxaa dhici karta in go`aamada ka soo baxa xarumaha warbaahinta Soomaaliyeed ay gaaraan ragga oo keliya.

## 5.3 Qaybinta Jinsiga ee qaab urureedka xarumaha warbaahinta.

Jaantus 4 - Qeybinta Jinsiga iyadoo loo eegayo Heerarka






19 xarumood oo la booqdey (15 xarun warbaahin iyo 4 urur), shaqaalaha dheddig oo haya xilalka muhiimka ah oo la tiriyay waxaa lagu qiyaasay iney yihiin oo keliya 23% (n = 157) shaqaalaha oo dhan. Isku celceliska xarumaha warbaahinta Soomaaliyeed waxaa ka shaqeeya 9 xubnood, kuwaas oo 2 keliya ay yihiin dheddig. Mar la soo booqday xarumaha warbaahinta ay hawluhu ka socdaan 47% (n = 36) ayaa haya xilalka hawlgallada, halka 39% (n = 36) ay leeyihiin kaalimo heer dhexe ah. Keliya 14% haweenka jawaabaha bixiyay ayaa qabtay jagooyin sare. Xagga ragga, xaaladdu way ka duwan tahay: 38% (n = 121) waxay ku fadhiyaan kuraasta sare. Tani waxay muujinaysaa in haweenku u muuqdaan inay qabtaan jagooyinka badan oo hoose.

Daraasaddan ayaa lagu soo gabagabeeyay in inta badan warbaahinta Soomaaliyeed ay ka maqan yihiin sharciyo qoran iyo nidaamyo ku salaysan shaqo-qorista. Sida lagu muujiyey xogta hoose, shaqaalaynta waxaa loo fuliyaa si aan rasmi ahayn. Maqnaanshaha habka habboon, ballamuhu waxay u furan yihiin maamulka, oo asal ahaan ka soo jeeda ragga. Maqnaanshaha guddiga shaqo-qorista ayaa tilmaamaya in laga yaabo in hannaanka uu cabsi galiyo suxufiyiinta dumarka ah, maaddaama ay raggu yihiin inta badan kuwa maamulka sare gacanta ku haya. Khibradaha laga helay goobo kale ayaa xaqiijinaya in xeerar iyo nidaam la'aan ay sababi karaan musuqmaasuq iyo ku-xad-gudub awoodda maamulka, taasoo laga yaabo inay dumarku u nugulaadaan cadaadis galmo.

## 5.4 Shaqaalaynta

### 5.4.1 Siyaasadaha iyo hababka

Shax 8 – Ma jiraan siyaasado iyo habraacyo loogu talagalay shaqaalayn caddaalad ku dhisan? - KII

| Goob | Maya | Haa | Jawaab ma laha | Wadar Guud |
|---|---|---|---|---|
| Baydhabo | 1 | 2 | | 3 |
| Garowe | | 3 | | 3 |
| Kismaayo | | 2 | 1 | 3 |
| Muqdisho | 1 | 9 | | 10 |
| **Wadar Guud** | **2** | **16** | **1** | **19** |

Shax 9 – Helitaanka siyaasado iyo habraacyo ku dhisan shaqaalayn caadil ah- KII

| Goob | La heri karo | Lama heli karo hadda | Jawaab ma laha | Lama dabbaqi karo | Jawaab Guud |
|---|---|---|---|---|---|
| Baydhabo | | 2 | | 1 | 3 |
| Garowe | 1 | 2 | | | 3 |
| Kismaayo | 1 | 1 | 1 | | 3 |
| Muqdisho | 1 | 8 | | 1 | 10 |
| **Jawaab Guud** | **3** | **13** | **1** | **2** | **19** |

19 warbixin oo muhiim ah (oo laga soo sameeyay 15 xarun warbaahineed iyo 4 urur), 16 (84%) ayaa sheegay in ururkoodu uu nidaam iyo habraac ku saabsan shaqaalayn caddaalad ku dhisan uu leeyahay. Hase yeeshee, kaliya 3 (16%) ayaa xaqiijin kara sheegashadaas. In kastoo ay maqan yihiin nidaamyada qoraalka ah ee loo qoondeeyay shaqo-qorista, haddana awoodaha iyo kartida xirfadeed ee murashaxa shaqada doonaya ayaa lagu qiimeeyaa iyada oo la adeegsanayo tixraacyo, iyo sidoo kale talooyin hore ee loo shaqeeyayaasha. Nidaamka shaqaalaynta wuxuu tixgeliyaa, heerarka waxbarasho, warbixinta xirfadaha, iyo khibradda. Nidaamkan mar kasta ma aha mid caddaalad ku fadhiya oo lagu kalsoonaan karo.

### 5.4.2 Nidaamka Shaqo-qorsita

Nidaamka wax shaqaalaynta ee lagu xusay jawaabaha ayaa ka mid ah: waxbarashada,

warbixinta xirfadaha oo soo raacda khibradda. Qaraabannimada ama qoysaska ama xiriirrada shakhsi ahaaneed ayaa sidoo kale lagu sheegay inay ka ciyaaraan kaalintooda aqoonsiga daneeyaha shaqada. Si kastaba ha ahaatee, mid ka mid ah warbixinnada muhiimka ah ee ugu dambeeya waxa ku jira shuruudaha shaqo-qorista. Xaqiiqdu waxay tahay in keliya 3 (16%) oo ka mid ah warbixinnada muhiimka ah ay awoodeen inay bixiyaan caddayn siyaasadaha shaqo-qorista iyo habraaca oo xaqiijinayaa doodda ah in aysan jirin siyaasado nidaamsan oo qoran si loo hagaajiyo shaqo-qorsita. Si kastaba ha ahaatee, waxaa la fahamsan yahay in ay jiraan shuruudo u adeega asaasna u ah shaqaaleynta shaqaalaha cusub. Si kastaba ha noqotee, waxaa la fahamsan yahay in ay jiraan shuruudo u adeega asaasna u ah si loo qoro shaqaale cusub. Marka loo eego jawaabaha, hannaanka shaqaalaynta waxaa ka mid ah dib-u-eegis aan rasmi ahayn in lagu sameeyo aqoonsiga musharraxa, talooyinka, iyo tixraacyada. Si kastaba ha noqotee, wali ma cadda sida dhabta ah ee ay kooxda shaqaalaysiinta u soo jeedinayso murrashaxa shaqada doonaya . Sidoo kale, waxaa iyana weli taagan hannaanka lagu aqoonsanayo iyo xayeysiisyada.

Shax 10 - Yaa qaadanaya go'aanka ugu dambeeya? WWM (Wareysiga Warbixinta Muhiimha ah)

| Yaa gaaraya go'aanka ugu dambeeya ee shaqo-qorista? | Noq Urur | Noq Raadiyo | Noq TV | Noq Wadar |
|---|---|---|---|---|
| Shaqaalaha maamulka | | 9 | | 9 |
| Madaxa Waaxda | | 3 | 1 | 4 |
| Jawaab ma laha | | | | 4 |
| Guddi | 4 | 1 | | 1 |
| Milkiilaha iyo shaqaalaha maamulka | | 1 | | 1 |
| **Wadar Guud** | 4 | 14 | 1 | 19 |

Jaantus 11 - Yaa gaaraya go'aanka ugu dambeeya? - Sahan

| Yaa gaaraya go'aanka ugu dambeeya ee qorista?? | J/celin joogta Dheddig | J/celin joogta Lab | Wadar J/celin joogta |
|---|---|---|---|
| Shaqaalaha Maamulka | 43 | 59 | 102 |
| Milkiilaha | 11 | 11 | 22 |
| Guddi | 2 | 10 | 12 |
| Madaxa Waaxda | 5 | 6 | 11 |
| Jawaab ma laha | | 1 | 1 |
| **Wadar Guud** | 61 | 87 | 148 |



Jaantus 5 - Yaa Qaadanaya Go'aanaka Kama Dambaysta ah? - KII




Jaantus 6 - Yaa Qaadanaya Go'aanaka Kama Dambaysta ah ee Shaqaalaynta? - Sahan




59 (n = 87) rag ah iyo 43 (n = 61) oo dumar ah ayaa sheegay in go'aaminta shaqaalaynta ay gaaraan shaqaalaha maamulka. 9 (n = 19) Warbixinaha muhiimka ah waxay iyaguna bixiyeen jawaab isku mid ah. Tani waxay muujinaysaa in shaqaalaha maamulka oo badankoodu rag yihiin, ay qaataan go'aannada muhiimka ah oo ku saabsan shaqo-qorista. Milkiilayaasha iyo kaddibna madaxda waaxaha waxay ku kala jiraan kaalinta labaad iyo sadexaad; 22 (n = 148) ee suxufiyiinta lagu waraystay ayaa ku jawaabay milkiilaha, halka 4 (n = 19) oo ka mid ah warbixinnada muhiimka ah laga soo xigtay Madaxa Waaxda. Telefishinka kaliya oo lagu tijaabiyey daraasaddan ayaa lagu xusay in Madaxa Waaxda uu yahay kan iskale go`aan gaarista sare. Inkastoo tani aysan noqonin mid macno leh, haddana waxay muujineysaa in madaxda waaxaha telefishannada ay ka xoog badan yihiin noocyada kale ee warbaahinta. Guud ahaan, xogta kor ku xusan waxay muujineysaa in go'aannaada shaqaalaynta inta badan ay leeyihiin ragga, kuwaaoo inta badan ka mid ah maamulka sare. Dumarku waxay ka hooseeyaan ragga markii la eego awoodda go`aan qaadashada. Sida aan kor ugaga soo hadalnay, tani waxay noqon kartaa arrin wax ku ool ah oo ku saabsan tirada yar ee laga shaqaalaysiiyay haweenka xirfadda warbaahinta.

Shax 12 – Iskudarka WWM (Wareysiyada Warbixinnda Muhiimka ah) iyo Sahanka

| Haddii Guddigu yahay mid isku dhafan? | Noq Haa | Noq Maya | Noq Wadar |
|---|---|---|---|
| Wareysi Muhiim ah | 2 | 0 | 2 |
| Sahan shakhsi ahaan | 6 | 6 | 12 |

Jaantus 7 - Haddi Guddigu Yahay mid isku dhafan?




2 (n = 19) Warbixinaha muhiimka ah waxaa lagu qeexay in go'aannada shaqaalaynta ay si wadajir ah u qaateen guddiyo isku dhaf ah oo ka kooban rag iyo dumar. Guud ahaan, kaqeybgalayaashu waxay caddeeyeen laba waji oo shaqo-qorsita ah: (i) xulashada dadka ugu awoodda badan; iyo (ii) go'aaminta qofka ugu habboon shaqada. Labada wajiba ma jiraan sharci toosan oo nidaamsan si wax looga qabto farqiga ragga iyo dumarka. Wajiga kowaad wuxuu ku lug leeyahay xulasho aan rasmi ahayn oo ku salaysan qaraabonnimo iyo xiriirro kale , halka midka labaadna ay ku lug leedahay qiimeynta natiijooyinka waxbarasho, warbixinta xirfadaha iyo khibradda. Xaaladaha qaarkood habkan waxaa lagu kabaa wareysiyada, hubinta tixraacyada, iyo talooyinka hore ee loo shaqeeyaha.

### 5.4.3 Xaqiraadda Guusha Haweenka

Guud ahaan, maamulka warbaahinta Soomaaliyeed waxay qirayaan farqiga u dhexeeya jinsiga marka laga hadlaayo shaqaalaynta. Dhamaan 19 warbaahin / ururro oo la booqday, keliya 36 ka mid ah 159 shaqaale (23%) ayay ahaayeen haween. Iyadoo lagu saleynayo jawaabaha sahanka, ururradani waxaa ka maqan aqoonta iyo fahamka loo baahan yahay si loo xaqiijiyo sinaanta jinsiga. Waxaa xiiso leh, shaqaalaha maamulka ee muujiyay rabitaanka in la qoro haween badan, dhab ahaantii waxay shaqaalaysiiyeen oo dallacsiiyeen rag badan markii loo eego haweenka labadii sano ee la soo dhaafay. Tani inkastoo ay xaqiiqadu tahay sida ku xusan natiijada, waxay ku tiirsan tahay go'aan ka gaarista shaqaalaysiinta. Xogta hoose waxay muujineysaa gabagabadan.

Jaantus 13 - Ma jiraan jagooyin aad u doorbidi lahayd lab ama dheddig? - WWM

| Goob | Noq Maya | Noq Haa | Noq Ma laha | Jawaab Noq Wadar |
|---|---|---|---|---|
| Baydhabo | 1 | 2 | | 3 |
| Garowe | 2 | 1 | | 3 |
| Kismaayo | | 2 | 1 | 3 |
| Muqdisho | 6 | 4 | | 10 |
| **Wadar Guud** | **4** | **9** | **1** | **19** |



Sida shaxda 13 na tuseyso, 9 (47%) oo ka mid ah 19ka warbixin oo muhiimka ah, dhammaan raggu waxay sheegeen in ay doorbidi lahaayeen in lagu magacaabo xarumahooda ama ururradooda. Iyada oo la tixraacayo su'aasha 4, (n = 9) ayaa tilmaamey doorbididda 'dumar badan' oo ka shaqeeya xarumaha warbaahinta. Sida shaxda 13 qof, 9 (47%) oo ka mid ah 19 warbixin oo muhiim ah, dhammaan haweenku waxay sheegeen in ay doorbidayaan in loo magacaabo xarumahooda ama ururadooda. Bixinta fursado isku mid ah labada jinsiba iyo magacaabida agaasime haween ah / barnaamijka soosaare haween ah ayaa ka mid ahaa jawaabaha kale ee la bixiyey.

Shax 14 – Waa noocee Jagooyinka? waana noocee jinsiga ku habboon jagooyinkaas?

| Haddii ay tahay haa, Waa kee nooca jinsiga ee munaasbka ah? | Noq Urur | Noq Raadiyo | NoqTV | Noq Wadar |
|---|---|---|---|---|
| Keliya dumar badan | | 4 | | 4 |
| Fursad loo siman yahay | | 1 | 1 | 2 |
| Haween maamule ah | | 2 | | 2 |
| Haween barnaamij-soosaare ah | | 1 | | 1 |
| **Wadar Wareysiyo** | **0** | **8** | **1** | **9** |

Shax 15 – Meeqa shaqaale cusub baad qortay 12kii bilood ee la soo dhaafay gudahood? - WWM

| Meeqa shaqaale cusub baad qortay 12kii bilood ee la soo dhaafay gudahood? | Dheddig tiro | Lab tiro | Wadar Tiro |
|---|---|---|---|
| Urur | J/Ma laha | J/Ma laha | J/Ma laha |
| FM Raadiyo | 41 | 81 | 122 |
| TV | 6 | 24 | 30 |
| **Wadar** | **47** | **105** | **152** |

Shax 16 – Shaqaale la dallacsiiyay 2dii sano ee la soo dhaafay - WWM

| Shaqaale la dallacsiiyay 2dii sano ee la soo dhaafay | Dheddig tiro | Lab tiro | Wadar Tiro |
|---|---|---|---|
| Urur | NAJ/Ma laha | J/Ma laha | J/Ma laha |
| FM Raadiyo | 12 | 18 | 30 |
| TV | 1 | 4 | 5 |
| **Wadar** | **13** | **22** | **35** |

Shax 17 – Shaqaale la cayriyay 2dii sano ee la soo dhaafay - KII

| Meeqa shaqaale ayaad shaqada cayrisay 2dii sano ee la soo dhaafay? | Dheddig tiro | Lab tiro | Wadar Tiro |
|---|---|---|---|
| Urur | NA | NA | NA |
| FM Raadiyo | 4 | 29 | 33 |
| TV | 0 | 0 | 0 |
| **Wadar** | **4** | **29** | **33** |

Jaantus 8 - Qaybinta jinsiga guud ahaan saddexda qaybood




Jaantus 9 - Jawaab - celinta Joogtada ah (Soo noqnoqota)




Xogta laga helay macluumaadka wareysiyada muhiimka ah ayaa shaaca ka qaaday in 152 shaqaale, 47 (31%) dumar ah iyo 105 (69%) rag ah, la shaqaaleysiiyay muddadii 12kii bilood ee la soo dhaafay sida ay qireen dhammaan hay'adaha la booqday. Wadar ahaan 35 shaqaale ayaa la dallacsiiyay 2dii sano ee la soo dhaafay: 13 (37%) haween ah iyo 22 (63%) lab ah. Waxaa ka jira warbaahinta Soomaaliya suuq sarreeya ee dhanka shaqaalaha ragga ah; Jaantuska 7 ayaa muujinaya in 33 shaqaale ah la eryey 2dii sano ee la soo dhaafay: 4 (12%) oo dumar ah iyo 29 (88%) oo rag ah.

Si kastaba ha ahaatee, muuqaal dhow oo muujinaya in haweenku ay ka yaryihiin 25% oo ka mid ah shaqaalaynta guud, 37% oo ka mid ah haweenka ayaa dallaacaad helay. Daraasaad la sameeyay waxay muujinaysaa in haween tiro yar la shaqaalaysiiyay marka loo eego ragga, oo la dallacsiiyay iyo / ama la eryay, iyada oo la tixgelinayo in tirada dumarka shaqaalaha ah ka hooseeyaan tirada ragga.Tani waxay muujineysaa u iilashada ama doorbididda shaqaalaha dheddig in la dallacsiiyo amaba la abaalmariyo. Keliya 12% ayay haweenku la kulmeen xaaladaha shaqo ka cayrinta ah. Tirooyinkaasi waxay u dhigmi karaan farqiga u dhaxeeya sinaan la'aanta jinsiga ee shaqaalaha guud ahaan, lakiin dabagal dheeraad ah ayaa lagu talinayaa si loo gaaro xaqiiqda.

Shan (56%, n = 9) oo ka mid ah ururrada shaqaalaha eryay 2dii sano ee la soo dhaafey waxay soo saareen go`aanno ku aaddan 'waxqabad-xumida' dhinaca shaqaalaha / wariyeyaasha. Akhlaaqda xun, caajiska, arrimaha imaatinka, iyo jebinta heshiiska oo dhammaan keeni kara shaqo ka eryid



Shaxda 18 - Sahan

| Maxay ahayd sababta tegitaanka? | Noq Dheddig | Noq Lab | Noq Wadar |
|---|---|---|---|
| Shaqo kale ma heshay? | 3 | 12 | 15 |
| Ma ogi | 7 | 8 | 15 |
| Jawaab ma laha | 0 | 5 | 5 |
| Guurka kaddibba waxaan shaqo shaqo ka helay goob kale | 0 | 1 | 2 |
| Mashaakil qoys | 1 | 1 | 1 |
| **Wadar 'Bidix' Noqnoqod** | **11** | **27** | **28** |

Jaantus 10 - Shaqaale si iskood ah shaqada uga tagay




Inta badan saxafiyiinta oo si iskood ah uga tagay shaqadoodii waxay ku qeexeen iney heleen 'shaqo kale' taasaana keentay iney ka baxaan shaqadoodii hore.Tani Tani waxay ahayd xaaladda 4 (36%) haween. Waxa mudan in la xusuusto in tiro badan oo saxafiyiin ah ay ku jawaabeen " Ma aqaan". Inkastoo Itirada jawaabta dhaheysa 'shaqo kalaan helay' waxaa la saadaalin karaa in sababaha looga tagayo shaqada ay noqon karto mid xasaasi ah ama inaan lagu qanacsanayn. Inta badan suxufiyiinta, labadaba haween iyo ragba, waxay ku caddeeyeen jawaabta su'aal kale oo sahanka ah oo ku saabsan inay karti u leeyihiin inay qaataan doorar kale / mas'uuliyadaha ururku leeyahay amaba ka jira, marka laga reebo waxa hadda lagu meeleeyay oo ay qabtaan.

Shax 19 - Ma u maleyneysaa inaad qaban kartid mas`uuliyad kale? - Sahan

| Ma u maleyneysaa inaad qaban kartid mas`uuliyad kale? | Noq Maya | Noq Haa | Noq Wadar |
|---|---|---|---|
| Dheddig | 9 | 52 | 61 |
| Lab | 8 | 79 | 87 |
| **Wadar Wareysi** | **17** | **131** | **148** |

Jaantus 11 - Ma u maleyneysaa inaad qaban kartid mas'uuliyad kale?




Waxay u muuqataa in ay isku raacsan yihiin jawaab-celiyeyaashu in doorarka iyo mas'uuliyadaha ilaa heer si caddaalad ah loo qoondeeyey, sidaas si la mid ahna dallacsiintu waxay ku saleysan tahay shaqo adag. Tani waxa ay ahayd jawaab celinta dumarka 75% iyo ragga oo ku jawaabay 78% Si kastaba ha ahaatee, inta soo hartay waxa ay muujisay takoorka jinsiga, maqnaanshaha nidaamka shaqo-qorista, iyo hufnaanta la'aanta nidaamka shaqaalaynta oo ay walaac ka muujiyeen. Si kastaba ha ahaatee, inta soo hartay waxa ay muujisay takoorka jinsiga, maqnaanshaha nidaamka shaqo-qorista, iyo hufnaanta la'aanta nidaamka shaqaalaynta oo ay

walaac ka muujiyeen . Cadaalad-darro dhinaca maareynta ayaa soo baxday iyada oo ah arrin muhiim ah marka ay timaado dhiirrigelin dad badan - lab iyo dheddig labadaba - inay ku soo biiraan xirfadda, oo ay la socdaan dhowr talo soo jeedin:

1. 1. Saxafiyiinta waa in ay muujiyaan habdhaqan wanaagsan iyo xirfad shaqo oo heer sare oo ay ku fuliyaan shaqo-maalmeedkooda;
2. 2- Waa in loo shaqeeyayaashu daryeel fiican u fidiyaan saxafiyiinta si ay dhallinyaro badan ugu soo jiitaan xirfadda.
3. 3. In la kordhiyo tirada xirfadlayaasha, si wanaagsan loo qaabeeyey, mabda 'ahaan, oo si fiican u qalabaysan si dhallinyaradu u arkaan mustaqbal iftiin leh oo xirfadeed.

Talooyinkaasi waxay tilmaamayaan xaqiiqda jirta taasoo ay ku jiraan xaaladaha shaqada ee aan fiicneyn ee saxafiyiinta Soomaaliyeed guud ahaan, sidoo kale saxafiyiinta dumarku waxay la kulmaan oo u dheer caqabadaha bulshada, ilaa xad.

## 5.5 Isbarbar-dheddigga jinsiga ee ku qanacsanaanta heerarka shaqo

Sahanku wuxuu shaaca ka qaaday in inta badan suxufiyiinta warbaahinta Soomaaliyeed ay ku qanacsan yihiin jagooyinkooda hadda. Si kastaba ha noqotee, kuwa aan ku qanacsanayn, intooda badani waa dumar. Jaantuska sare wuxuu muujinayaa in 9 (15%, n = 61) ay haweenku muujiyeen ineyan ku faraxsanayn, marka loo eego 8 (9%, n = 87) ragga. Sababaha ay uga xun yihiin waxay isku mid ka ahaayeen labada jinsiba , waxayna hoos ugu taxan yihiin qaabka noqnoqod ama joogtada ah.

- Waxaan u maleynayaa inaan u qalmo meel ka wanaagsan tan;
- Waxaan rabaa meel ka wanaagsan halkan ama meel kale;
- Waxtarkeedaa yar' ama 'Ma sii wadi karo xirfadeyda'

Inkasta oo ay u muuqato inay tahay mid aad u sarreeya warwareegista ragga wariyeyaasha ah ee Soomaaliya, ayay xarumaha warbaahintu u muuqdaan inay iyaguna dadaal ku bixinayaan sidii ay u sii wadi lahaayeen shaqaalaynta.

Dhammaan 14 xarun warbaahineed ayaa sheegay in ay leeyihiin nidaamka haynta shaqaalaha ama ku sugnaanta goob. Kaliya 37 (25%) ee sahan su`aalo la qaaday ah jawaab bixiyayaasha (n = 148) ayaa sheegay inayan haysan qorshe haynta ama nagayn. 37 oo ah 26% (n = 61) ee dheddig iyo 24% (n = 87) ee lab ayaa la wareystay. Si kastaba ha noqotee, 110 (74%) haweenka jawaab bixiyayaasha ah waxay xaqiijiyeen jiritaanka nidaamka xajinta shaqaalaha, oo ku dhowaad isku midka ah saamiga ragga (75%). Marka la waydiiyo waxa nidaamyadani u baahan yihiin, jawaab-celiyeyaashu waxay bixiyeen jawaabo kala duwan, kuwa ugu muhiimsanna ay yihiin:

- Horumarinta Xirfadaha
- Abaalmarinnada
- Horumarinta/Dallacsiinta
- Haddiyadaha
- Dhiirigelinta iyo tababarada

Dhamaan kuwan waxaa la siiyaa abaalmarin ku saabsan waxqabadka ku haboon ama guusha ay gaareen, laakiin si aan joogto ahayn. Si kastaba ha noqotee, sida xogta hore ay muujinayso, suxufiyiinta lab waxay u badan tahay inay ka faa'iideystaan abaalmarinnadaasmarka loo eego asxaabtooda shaqada ee dumarka.

Jaantus 12 - Ma ku faraxsan tahay jagadaada hadda?




Jaantus 13






Shax 20 - Immisa xarun warbaahin ayaad ka soo shaqaysay muddadii 2da sano ahayd ee la soo dhaafay? – Sahan

| Immisa xarun warbaahin ayaad ka soo shaqaysay muddadii 2da sano ahayd ee la soo dhaafay? | Noq Dh | Noq Lab | Noq Wadar | Muujinta Muuqaalka Dhammaan Xogta | Muujinta Muuqaalka Boqolkiiba |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 26 | 37 | **63** | 148 | **100%** |
| 2 | 19 | 28 | **47** | 85 | **57%** |
| 3 | 15 | 14 | **29** | 38 | **26%** |
| 4 | 1 | 5 | **6** | 9 | **6%** |
| 5 | | 2 | **2** | 3 | **2%** |
| 7 | | 1 | **1** | 1 | **1%** |
| **Wadarta wareysiyada** | **21** | **87** | **148** | | |

Ugu yaraan 32% jawaab bixiyayaasha sahanka intooda badanna ay yihiin lab, waxay sheegeen in ay beddeleen shaqooyinkooda laba jeer labadii sano ee la soo dhaafay. Inkasta oo inta badan saxafiyiinta ay ku sugnaayeen hal warbaahin, natiijooyinka sahanku waxay muujinayaan in saxafiyiinta ragga ah ay ogaadeen iney fududdahay inay ka tagaan shaqo oo tu kale u wareegaan markii la barbardhigo haweenka ay wada shaqeeyaan. 148 qof oo ka soo jawaabay, 35 haween ah ayaa ka shaqeynayay ugu yaraan laba xarumood warbaahin, oo ay ka mid yihiin ilaa 50 rag ah. Sababaha looga tagayo shaqada waxaa ka mid ah:

- khilaafka maamulka
- Horumarinta Xirfadaha
- Arrimaha lacag bixinta
- Guurid

Sababaha ugu muhiimsan ee joogitaanka hal goob shaqo 2dii sano ee la soo dhaafay waxay ahaayeen sidan soo socota:

- Waxaan ku cusbahay xirfadda warbaahinta iyo shaqadan
- Waan ku faraxsanahay inaan halkan ka shaqeeyo
- Anigu ma heli Karin shaqo kale
- Waxaan ahaa mid la ixtaraamo, mushaharo fiicanna waan qaadanayay
- Maamulku wuu fiicanyahay

Sababaha kale oo yaryar ayaa la sheegay oo ay ka mid yihiin: (heshiis joogto ah, shaqaale wadashaqayn wanaagsan ay ka dhexeyso, jawiga shaqada oo fiican iyo iney haysteen jagooyin sare oo maamulka ah). Saxafiyiinta la waraystay waxay aaminsanyihiin in warbaahintu ay tahay goob shaqo oo fiican, maxaa yeelay way fududdahay in lagu soo biiro, waayo-aragnimo inaad yeelato oo caan kaa dhigto iyo ugu dambayntii aad heshid waxaad ku noolaatid.

Dhanka kalena waxaa la tilmaamay astaamaha xun ayaa laga soo sheegay:

- Mushaarka oo yar
- Amniga – Hanjabaadda iyo khatarta
- Ammaanka Haweenka
- Arimaha Dhaqanka – Warbaahintu maaha xirfad haween

Intaa waxaa dheer, saddex-meelood meel ka mid ah ka-qaybgalayaasha kooxaha falanqaynta ayaa sheegay in ay tixgeliyeen inay ka tagayaan shaqooyinkooda hadda oo ayna raadinayaan meel ka fiican, mushahar sare, iyo nabadgelyo dheeraad ah. Kooxahu waxay soo jeediyeen waxyaabahan soo socda oo ku hayn Kara xarumahooda hadda iney sii joogaan:

- Mushahar wanaagsan
- Kobcinta xirfadaha gudaha xarumaha warbaahinta ee hadda jira
- Amniga
- Ixtiraam / qadarin

## 5.6 Qaabka xaaladaha badbaadada iyo amniga iyadoo xoogga la saarayo haweenka

### 5.6.1 - Badbaadada iyo Amniga

Badbaadada iyo nabadgelyada saxafiyiinta haweenka: Khatarta hanjabaadda

Dumarka suxufiyiinta Soomaaliya jooga waxay dareemaan nabadgelyo badan markii ay ku sugan yihiin goobahooda shaqo, taasoo ay ka duwan tahay markii ay bannaanka joogaan. Ammaanka waa walaaca ugu weyn, ugu

horreyntii Muqdisho aad bay uga jilicsantahay degganaanshaha xasiloonida siyaasadeed markii la eego meelaha kale sida: Kismaayo, Garoowe iyo Baydhabo. Tani waxaa lagu muujiyey garaafyada hoose. Si kastaba ha ahaatee, jawaabeyaasha raggu waxay u muuqdaan inay dareemaan khatar badan (53% n = 87) marka loo eego haweenka (48% n = 61), waxaa laga yaabaa inay sababtu tahay in raggu ay noqdaan inta badan suxufiyiinta badanaa qabta hawlaha diyaarinta wararka iyo tifaftirkooda.

Jaantus 14 - Sideed u qeexi lahayd amnigaaga iyo nabadgelyadaada goobtaada shaqada?




Jaantus 15 - Sideed u qeexi lahayd amnigaaga iyo nabadgelyadaada meel ka baxsan goob taada shaqada?




Shax 21 Gudaha meel ka baxsan goobta shaqada – Sahan

| Badbaado iyo Amni | Goota Shaqada | Ka baxsan goobta Shaqada |
|---|---|---|
| Aad u xun | 1% | 9% |
| Xun | 5% | 15% |
| Dhexdhexaad ah | 28% | 45% |
| Fiican | 26% | 18% |
| Aad u fiican | 41% | 14% |

Jaantus 16 - Isbarbardhiga: Gudaha iyo Debadda ee goobta shaqda




- Amniga goobaha shaqada: 67% (n = 148) ee jawaab bixiyayaasha wxay ku jawaabeen wanaagsan ama aad u wanaagsan. Tani waxay ka dhigan tahay 59% (n = 61) ee dheddigga iyo 72% (n = 87) oo ragga ah. keliya 7 (5%) jawaabeyaasha, oo dhammaan ka soo jeeda Muqdisho, ayaa hoosta ka xarriiqay in ammaankooda ahaa mid 'xun' oo kaliya hal qof oo ka yimid Garoowe ayaa ku tilmaamay 'aad u xun' goobta shaqada.
- Amniga dibadda ka ah goobta shaqada: Waa kuwan jawaabaha oo u dhacaya qaabka (Jawaab celinta Noqnoqodka).
  - Dhexdhexaad - 45%
  - Fiican - 17%
  - Xun - 15%
  - Aad u fiican - 14%
  - Aad u xun - 9%

Sida xogta sahanka kor ku xusan ay muujinayso guud ahaan, amniga looma arko inuu yahay arrin wayn, waase arrin welwel leh gaar ahaan wixii ka baxsan goobta shaqada. Inta badan dadka jawaabaha bixiyey (78%, oo ka kooban 80% dumara iyo 76% raga) waxay ku tilmaameen xaaladdooda goobta shaqada mid nugul (eeg Jaantus 17), halka tiro badan (45%) ay dhaheen amniga goobtu mana wanaagsanayn mana xumayn.

Jaantus 17 - Sidee ayaad ku tilmaami kartaa amnigaaga iyo amniga intaad ku sugan tahay goobta?




Jaantus 18 - Sidee ku tilmaami lahyd amnigaaga iyo amnigaaga intaad ku sugan tahay goobta?




Khataraha amniga inta la joogo goobta shaqada, tusaale, marka shaqada lagu jiro ayay xaaladdu tahay mid ka feker badan markii loo eego markii aanu xafiisku shaqaynayn. 78% (DH = 43%, L = 57%) suxufiyiinta la waraystay ee goobta shaqada ayaa waxay dareemayaan nugeyl iyo welwel.

Cabsigelinta iyo khatarta ayaa goobaha qaarkood aad u sarreeya sida : Muqdisho iyo Baydhabo halkaas oo xaaladdu tahay mid jilicsan, weerarrada loo geysanyo saxafiyiintuna weli waa joogto.

Kooxaha falanqaynta ayaa iyagu qaba in aysan jirin wax welwel ah oo dhinaca amaanka ah, oo kaliya 25% ayaa sheegey suurtagalnimada weerarro ka dhan ah suxufiyiinta.

**Hanjabaadaha ay la kulmaan Saxafiyiinta iyo tallaabooyinka amniga ee loogu talogalay ilaalintooda**

Jaantus 19 - Weligaa ma laguu hanjabay?




Jaantus 20 - Iladday haa tahay, maxay ahaayeen hanjabaadaha?






Jaantus 21 - Haddi ay haa tahay, waa kuwee?




51% (n = 148) ee ka mid ah jawaabeyaashu waxay sheegeen in loo hanjabay (48% (n = 61) oo dumar ah iyo 53% (n = 87) oo rag ah). Jawaab celiyeyaashu waxay sheegeen oo kale in loogu hanjabay ficilladan: dil (32%), xarig (6%), weerar (5%). Sida ku xusan Jaantuska 21, khatarta labaad ee ugu badan ee dumarka loogu hanjabo dhimashada kaddib waa weerarka, halka ragga loogu hanjabo xarig. Ilaha ugu weyn ee khatartu waa Kooxaha Dibadda, kuwaas oo ah kooxaha argagaxisada ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, daraasaddan waxay shaaca ka qaadday welwelka ah: 17% (n = 29) ee haweenku waxay ku cadeeyeen inay yihiin siyaabo khatar ah. Ragga dhexdiisa, halista ugu badan ee laga soo xigtay waxay ahayd 'Ilaha wararka'. 17% (n = 29) ee haweenka ayaa ku sharxay halkooda ugu sarreysa ee ilaha hanjabaadaha. Ragga khatarta labaad ee ugu badan ee laga soo xigtay waa 'Ilaha wararka'.

Jaantus 22 - Maxay yihiin khatarta guud ee ay jahayaan saxafiyiinta? (Habda goobta)




Sida laga soo xigtay Warbixinta muhiimka ah, khatarta guud ee soo wajahda suxufiyiinta ayaa weli ah 'Amniga'. Waxaa in la xuso mudan in tiro aad u badan ay dhaheen 'Midna', taas macneheedu yahay wax hanjabaad ahi ma jiraan gebi ahaanba. Kuwani waa dadka jawaabaha bixiya inta badan oo ka soo kala jeeda magaalooyinka Garoowe (2/19) iyo Kismaayo (1/19). Tilmaamahaasoo laga yaabo inay xaaladahooda waxoogaa ka wanaagsan yihiin goobahan, iyadoo ay ku xiran tahay deganaanshahooda. Celcelis ahaan, ma jiraan qorshe ammaan oo gaar ah oo loogu talagalay saxafiyiinta haweenka warbaahinta Soomaaliyeed. Daraasaddan ayaa lagu ogaaday in ay jiraan wax aad u yar - hadii ay jiraan - tallaabooyin ammaan oo lagu dabbaqayo saxafiyiinta dheddig iyo lab labaduba. Markii la waydiiyay qorshaha amniga ay xarumuha warbaahintu u fidiyaan shaqaalaha, 6 (n = 19) oo ka mid ah ayaa yiri midna; 16% (n = 19) ayaa ku jawaabay shaqaalaha amniga; 11% (n = 19) ayaa xusay 'kor u qaadidda wacyi-gelinta' shaqaalaha; iyo 11% (n = 19) oo sheegay inayan awoodi Karin tallaabooyin ay ammaanka wax kaga qabanayaan.

Si kastaba ha ahaatee, 74% (n = 19) oo ka mid ah warbixinnada muhiimka ah ayaa sheegay in ay qabeen nidaamyo xagga amniga ah. Su'aalaha soo socda ee ku saabsan nooca nidaamyada ay tilmaaman, ayaa jawaabaha soo socda laga bixiyay

1. Ka warhaynta ka hor inta aan la dirin`
2. Tababar
3. U fidi nidaamyada amniga iyo habka goobta shaqada
4. Waxaan ka fogaaneynaa inaan u dirno meelo khatar ah
5. Raac xeerarka amniga ee gobolka

Jaantus 23 - Ma qiimeysaa khatarta int aadan shaqaalahaaga shaqada u dirin?




17 (n = 19) jawaabeyaasha wareysiyada warbixinaha muhiimka ah, iyo sidoo kale hoggaamiyayaasha xarumaha warbaahinta, waxay sheegeen in ay sameeyaan qiimaynta khatarta ka hor inta ayan shaqada u dirin shaqaalahooda. Markii la waydiiyay habka ay uga jawaabaan lacalla haddii uu dhaco shil ee uu ku jiro weerar, xarig, dil loo gaystay shaqaalahooda, jawaabaha soo socda ayaa laga bixiyay oo u qoran habka jawaab-celinta joogtada ah:

- Caawinaad hadba sidaan u awoodno
- Waan dibad-baxnaa/qaadacnaa
- Waan garab istaagnaa, isla waqtigaasna waan bannaanbaxnaa, intaasoo dhanna waa waxaan awoodno.
- Digniin masuuliyiinta ku habboon / daneeyayaasha
- Haddii la xiro saxafi, dhammaan ururrada warbaahinta waxaan yeelannaa iskaashi iyo wadashaqayn si loo xaqiijiyo sii deynta saxafiga ama saxafiyiinta.
- Waan eedeynenaa/cambaareynaa
- Nabadgelyadeenna darteed waxba ma samayno.
- La xiriir adeegyada amniga ee gobolka si loo helo gargaar.
- Haddii uu dhaco dil, waxaanu gargaar u fidinnaa qoyskiisa/qoyskeeda.

Ma jiro mid ka mid ah jawaabaha kor ku xusan oo bixinaya tilmaan cad oo muujinaysa jiritaanka habab rasmi ah oo wax looga qaban karo dhacdooyinka noocaas ah. Qiimaynta khatarta ee suurtogalka ah waxay caadi ahaan horseedaa istiraatiijiyado wax ka qabashada xaaladaha noocaas ah. Si kastaba ha ahaatee, jawaabahaas, waxay tilmaamayaan in tallaabooyinkan oo kale aysan jirin iyo inaysan jirin qaab nidaamsan oo lagu xallinayo xaaladda. Macluumaad laga helay 10 xarun warbaahin (n = 19) ayaa sheegay in ay la kulmeen / maqleen dhacdooyinka ammaanka shaqaalahooda intii lagu jiray 6dii bilood ee hore. Markii la waydiiyay in haween iyo rag labadaba ay saameeyeen dhacdooyinkan, jawaabahooda oo u dhisan habka jawaab-celcelinta joogtada ah waa sida soo socota:

1. Lab - Qaar ka mid ah jawaab bixiyeyaashu waxay u saameeyeen tirakoobka tirada badan ee ragga.
2. Dheddig - qadar yar
3. Maya/Waxba

### 5.6.2 Dhibaataynta Jinsiga

Sahankan wuxuu muujinayaa in falalka hadda jira ee dhibaateynta jinsiga ee lagu maquuniyo dumarka ay yihiin kuwa ugu waaweyn kuwa kor ku xusan ee dembiileyaasha, oo ay ku xigaan shaqaalaha la shaqeeya ilaa kuwa darajada hoose, gobolka ama saraakiisha dawladda.

Inkastoo 13% oo keliya ee dadka la wareystay ay sheegeen in shakhsi ahaan loo geystey dhibaateyn galmo, taas oo muujin karta tiro aad u ballaaran oo aan la sheegin, taasoo ugu wacan in aysan jirin xeerar gaar ah oo jinsiga ah si wax looga qabto arrintan. Xaqiiqda ah in kooxaha falanqaynta ay diideen eedeymaha ah in dhibaataynta jinsiga ay dhibaato ka haysato saxaafadda ayaa muujisay in tani ay tahay mawduuc xasaasi ah oo u baahan Kara qaab istiraatiiji ah oo lagu heli karo xogo badan



Jaantus 24 - Tallaabooyin caynkee ah baad qaadi lahayd haddii laguu soo bandhigo?




Shax 22

| Jawaabaha dheddigga ee habka jawaab-celinta joogtada ah | Jawaabaha labka ee habka jawaab-celinta joogtada ah |
|---|---|
| Ammaanka Shaqada | Ammaanka Shaqada |
| Qofna wax kama galin, waad ka tagi kartaa shaqada ama waad joogi kartaa. Waa go`aankaga | Nabadgelyada iyo ammaannka shaqada |
| Nabadgelyada iyo ammaannka shaqada | Nabadgelyada iyo ammaannka shaqada |
| Waxaan u baqayaa nabadgelyadeyda | Waxaan u baqayaa nabadgelyadeyda |

**Iskaashiga si wax looga qabto dhibaataynta galmada**

Wadarta 15% (n = 148) (59% = L = 41%) ee dadka la wareystay waxay soo sheegeen in aysan jirin wax farsamooyin ah oo lagula tacaalayo kadeedka galmada, halka 5% (n = 148) (Dh = 29% L = 71%) waxay aaminsanyihiin in ay jiraan nidaam lagu ciqaabayo dambiilayaasha, ama takoor ama ganaaxyo kale. Keliya 3% (n = 148) (F = 60%,L = 40%) oo ku xusan nidaamka warbixinta, halka 1% (1 Dheddig, 1 lab ah) ay sheegeen xaal dhaqameed - Qaar kalena 111 (n = 148) kama jawaabin. 53% (n = 19) oo ka mid ah warbixinnada ugu waaweyn ayaa sheegay in dambiilayaashu ay la kulmeen ciqaab kala duwan, noocyada kale oo ciqaab ah oo laga soo guuriyay meelo kale, halka 11% (19%) ay sheegeen in falalka lagu wargaliyay gobolka ama booliiska, (N = 19) oo ka yimid warbixinnada muhiimka ah ayaa sheegtay in arrinka lagu xalliyay hababka dhaqanka.

Ugu dambeyntii, kooxaha falanqaynta waxay soo jeediyeen talooyinnka soo socda sidii loola tacaali lahaa dhibaataynta:

- Iney shaqaalaha warbaahintu midoobaan, maxkamadahana u gudbiyaan dhamaan faldambiyeyada dhibaateynta.
- Dhismo kooxo taageero
- Dembiileyaashu inay wajahaan ciqaabta ay u qalmaan

Xusuusin in go'aanka ugu muhiimsan ee doorka warbaahinta Soomaaliya ay inta badan qaataan kooxaha maareynta ugu sarreeya ee ragga, in dhibaatada galmada ay inta badan ku dhacdo dumarka kuna sameeyaan madaxdooda sare iyo ineyan warbaahintu ka jirin sharciyo si cad u qeexaya jinsiga, daraasaddan waxay shaaca ka qaadday iney weli jiraan wax badan oo loo baahan yahay in wax laga qabto si loo hubiyo in dhibaataynta galmada si wax ku ool ah loo xalliyo

## 5.7 Dareenka jinsiga ee heshiisyada shaqada

Warbaahinta Soomaaliyeed waxay la il-daran tahay shuruudo la`aanta jinsiga ee heshiis-galka. Guud ahaan, waxay u muuqataa in ay tahay

hab isdabajooga oo lagu sameeyo heshiisyada iyada oo aan loo eegin jinsiga, iyadoo lab iyo dheddigba ay shaqeeyaan mudo dheer (ilaa 10 saacadood ah), oo gelaya kaltan habeen, qaadanayana mushaarka ugu yar. Inkastoo daraasadani aysan si gaar ah u muujin Karin farqiga jinsiga ee mushaharka, dhammaan jawaab bixiyeyaashu way awoodi Kari waayeen iney muujiyaan jiritaanka miisaaniyadda mushaharka. Tani waxay muujinaysaa daahfurnaan la'aanta mushaharka.
Inta badan jawaabeyaasha qof ahaaneed (76%) waxay xaqiijiyeen jiritaanka miisaaniyadda mushaharka. 4% (Dh 50%, L 50%) waxay ku jawaabeen 'Mushar La'aan', taas oo micnaheedu yahay mushar lama siiyo. 67% (n = 148) ayaa ka sheeganaya in miisaaniyadda mushaharka si siman loogu dabbaqo shaqaalaha lab iyo dheddig. Kooxdan hoose, 36 waa dumar, taasoo ka dhigan 59% wadarta guud ee la waraystay; 79 waa rag, oo u dhigma 91% wadarta ragga. Si kastaba ha ahaatee, 20% (= 148) ayaa aaminsan in miisaaniyadda mushaharku aan si siman loogu jaangoyn ragga iyo dumarka. Kooxda hoose ee dambe waxay ka kooban tahay 26% oo haween ah oo la wareystay, iyo 15% rag ah.

Intaa waxa dheer, jawaabeyaasha qaarkood baa xataa aan hubin in ururradooda ay leeyihiin sharciyada fasaxa dhalmada, ama inta fasaxa uu noqonayo. Tirooyinka hoos ku qoran waxay muujinayaan, inkasta oo dhamaan jawaabaha ay ku sheegeen in ay haystaan heshiisyo adag oo laba geesood ah, ma jiraan wax isbeddel ah inta ay ka og yihiin sharciyada xafiiska shaqaalaha hay`addooda. Warbixinnada muhiimka ah ee 19ka warbaahin wareysiyadii laga qaaday, 15 ayaa sheegay in ay saxiixeen heshiisyo ay la galeen loo shaqeeyeyaasha; 81 (n = 148) oo ka mid ah jawaabaha shakhsi ahaaneed ayaa sidoo kale sheegay in ay heshiis la galeen kuwa ay u shaqeeyaan. Tani waxay ka dhigan tahay inta badan labada jinsi, 56% dumar iyo 55% rag.

Jaantus 25 - Ma leedahay heshiis aad la gashay ha 'yaddaada?




Xaaladda jebinta heshiiska, 10 (15%) oo ka mid ah agaasimayaasha xarumaha warbaahinta ayaa sheegay in arrinta loo gudbiyay guddiga cabashooyinka, 3 (n = 15) ayaa sheegay in arrinka lagu xallin doono habab dhaqameed; 1 in loo maareyn doono si waafaqsan siyaasadda Qorshaha Ururka.

17 ka mid warbixinnada muhiimka ah oo ay ku jiraan laba urur, waxay aaminsan yihiin in shaqaalaha warbaahintu ku lug leeyihiin waqtiyada muhiimka ah ee go'aan qaadashada, gaar ahaan marka ay saameyn doonto go'aanka su'aasha. Waxay sidoo kale ku dareen in go'aaminta si sax ah loogu gudbiyo shaqaalaha ku habboon.

Xaqiiqda ah in ururrada ay la macaamilaan oo heshiis la galaan maamulayaasha xarumaha warbaahinta ayaa ah mi ku kor u qaadeysa kalsoonidooda. 16 warbixinnada muhiimka ah (n = 19), 2 urur, iyo 14 agaasime ee xarumaha warbaahinta ayaa sheegay in ururradooda ay leeyihiin sharciyo shaqaale, si kastaba ha ahaatee, sida hore loogu soo sheegay, kaliya 3 ayaa awoodday inay soo gudbiyaan sharciyo qoran markii la waydiistay.



Jaantus 26 - Ma leedahay siyaasadaha maamulka shaqaalaha?




16 warbixinaha muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin 2 urur, waxay soo sheegeen jiritaanka sharciyada fasaxa dhalmada hooyada iyo Kan aabbennimo. 129 (n = 148), 87% saxafiyiin la wareystay ayaa sidoo kale xaqiijiyay tan, 87% waxay ka dhigan tahay 82% (n = 61) ee dheddigga iyo 91% (n = 87) ragga.
Iyagoo ka jawaabaya su'aalo dabagal ah oo ku saabsan sharciyadahan, jawaab-celiyeyaashu waxay bixiyeen jawaabaha hoos ku xusan.

Shax 23 – Sharciyada fasaxa hooyada iyo aabbanimada

| Jawaabaha waresiyada muhiimka ah | Jawaabaha sahanka |
|---|---|
| Habku waa: Shaqaaluhu waa inuu soo gudbiyaa arji marka ugu horreysa dhalmada kadib, fasaxa ayaa la siiyaa | Habku waa: Shaqaaluhu waa inuu soo gudbiyaan arji marka ugu horreysa dhalmada kadib, fasaxa ayaa la siiyaa |
| Waxay kuxirantahay haddii maamulka uu aqoonsado baahida | Fasaxa umusha waa qasab markaad dhaleyso |
| Fasaxa dhalmada hooyo HAA, midka aabbannimo MAYA | 3 bilood oo fasaxa oo ka bilaabata taariikhda |
| Fasaxa dhalmada hooyada iyo kan aabeba waa la bixiyaa labadaba, kan aabbaha waa 2 bilood, kan hooyadu waa 3 bilood. | 2 bilood fasax ah |
| | Maalmo yar oo nasasho ah ayaa la siiyaa |
| | 4 bilood oo fasax ah, laakiin hooyada keliya |
| | 40 maalmood oo fasaxa umusha ah oo laga bilaabo maalinta shaqada |
| | Maalmo nasasho ku filan ayaa la bixiyaa |

Jaantus 27 - Sahan



Jawaabta su'aasha ku saabsan saacadaha shaqada caadiga ah, jawaabta ugu badan ee la bixiyay (25% jawaab bixiyayaasha) waxay ahayd 8 saacadood. Si kastaba ha noqotee, ilaa 8% ayaa sheegaya inay shaqeeyaan 12 saacadood, 3% waxay sheegeen 24 saacadood. Shaxda hoose ayaad ka arki kartaa faafhfaahin dheeraad ah. Sida laga soo xigtay warbixinnada muhiimka ah, saacadaha shaqada waxay u dhexeeyaan 4 ilaa 10 saacadood, iyadoo ku xiran nooca warbaahinta, waqtiyada ay idaacaduhu hadlaan, ama telefiishinnada, barnaamijyada, iyo suugaanta.

Shax 24 - Imisa saacadood ayaad shaqeysaa maalin kasta? Sahan

| Immisa saacadood ayaad shaqeeysaa maalinkii? | Noq Dheddig | Noq Lab | Noq Wadar | Boqolkiiba |
|---|---|---|---|---|
| 8 | 21 | 16 | 37 | 25 |
| 10 | 11 | 13 | 24 | 16 |
| 6 | 10 | 11 | 21 | 14 |
| 4 | 4 | 9 | 13 | 9 |
| 12 | | 12 | 12 | 8 |
| 7 | 5 | 6 | 11 | 7 |
| 9 | 2 | 4 | 6 | 4 |
| 24 | | 5 | 5 | 3 |
| 5 | 2 | 2 | 4 | 3 |
| 2 | 2 | 1 | 3 | 2 |
| 16 | | 3 | 3 | 2 |
| 18 | | 3 | 3 | 2 |
| 2 | 2 | | 2 | 1 |
| 11 | 1 | 1 | 2 | 1 |
| 1 | 1 | | 1 | 1 |
| 15 | | 1 | 1 | 1 |
| **Noqnoqod Wadar Wareysiyo** | **61** | **87** | **87** | **100%** |

8% (39% dumarka iyo 71% ragga) ayaa sheegay in ay habeenkii shaqeeyaan. Markii wax laga waydiiyay caqabadaha ay la kulmaan hawlaha habeenkii, jawaabaha ugu muhiimsan waxay ahaayeen ammaan darro (28%) iyo gaadiid (23%). Ku dhowaad dhammaan saxafiyiinta (97%) iyo dhammaan warbixinnaha muhiimka ah (100%) waxay isla qireen in saxafiyiinta ay shaqo dheeri ah qabtaan. 86% saxafiyiin iyo 58% warbixinnaha muhiimka ah ayaa mar kale isku raacay inaanan magdhaw ama gunno lagu siin saxafiyiinta shaqadan dheeriga ah oo ay qabtaan.

Jaantus 28 - Habeenkii miyaad shaqeysaa? Sahanka






Natiijooyinka waxay tilmaamayaan in aysan jirin xeerar caymis shaqaale: 95% jawaabeyaasha (140 ka mid ah 148) ayaa sheegaya in aysan haysan dukumentiyo caymis. 17 (13 xarun warbaahin iyo 4 urur) oo ka mid ah 19 warbixinnaha muhiimka ah ayaa isla waafaqay, sida ku cad jaantuska hoose. Natiijooyinka wareysiga ugu muhiimsan ayaa muujinaya natiijooyin la midka ah. In ka badan 75% ayaa sheegay in ay jirto miisaaniyad xagga mushaharka ah. Hase yeeshee, tani macnaheedu maaha in heerarkaasi si fiican loo qaabeeyay iyo / ama si habeysan loo dabbaqay, maadaama aysan jirin sharciyo maamulid shaqaale oo qoran. Xogta sahankani ma aysan awoodin inay caddeeyso farqiga mushaharka jinsiga. Si kastaba ha ahaatee, qaabka warbaahinta Soomaaliyeed, iyada oo haweenkoodu laga dhigay shaqaale hoose ayay haddana ragga ka badan yihiin markii la eego faaiidooyinnka mushaharooyinka saxafiyiinta Soomaaliyeed ay guud ahaan qaataan.

Jaantus 29 - Miyuu jiraa miisaan mushahar ee jagooyinka kala duwana?




Celceliska mushaharka ugu yar iyo Kan ugu sarreeya, sida ay soo bandhigeen shakhsiyaad saxafiyiin ah iyo warbixinno muhiim ah, waxay muujinayaan iney celcelis ahaan ka hooseeyaan celceliska sahanka. Celceliska mushaharka ugu hooseeya waa $ 109 (US $ 100 iyo US $ 9), halka celceliska ugu sarreeyana uu yahay US $ 463.

Jaantus 30 - Qiyaasta Mushaharka ugu hooseeya iyo kan ugu sarreeya - Shanka iyo WWM



## 5.8 Tababarro u gaar ah jinsiga ah

Tababarrada jinsigu waa mid aan aad looga aqoon saxaafadda Soomaalida dhexdeeda, keliya 26% ka mid ah jawaab bixiyayaashu ayaa sheegeen in ay ka qaybgaleen tababarka noocaas ah. Tiro aad u badan oo ka mid ah mid ah haweenka ayaa tilmaamaya in ay qaateen tababarka noocaan oo kale ah markii loo fiiriyo ragga. 30% dumar iyo 24% rag. Sidoo kale, inta badan xubnaha kooxda falanqaynta ayaa sheegay in aysan sameynin tababar u gaar ah ee jinsiga.

Jaantus 31 - Ma heshay wax tababar ah oo u gaar ah jinsiga?




Shax - 25 ayaa sidoo kale muujinaya noocyada tababarrada ay qaadeen 26% ee jawaabaha shakhsi ahaaneed.
Shax 25 - Haddii ay haa tahay, fadlan magacaw kuwa ay yihiin. – Sahan

| Haddii ay haa tahay, fadlan magacaw kuwa ay yihiin | Noq Dheddig | Noq Lab | Noq Wadar |
|---|---|---|---|
| Sinaanta Jinsiga | 8 | 16 | 24 |
| Xoojinta Haweenka Soomaaliyeed | 2 | 1 | 3 |
| Badbaadada Haweenka Suxufiyiinta | 2 | | 2 |
| Sinnaanta Awoodda Jinsiga | 1 | 1 | 2 |
| Xadgudubka ka dhanka ah haweenka | 1 | 1 | 2 |
| Gudniinka Fircooniga | | 1 | 1 |
| Kaalinta hoggaaminta ee dumarka | 1 | | 1 |
| U sinnaanta fursadaha jinsiga | 1 | | 1 |
| Tababbarka badbaadada haweenka | 1 | | 1 |
| Maamulka warbaahinta iyo haweenka | 1 | | 1 |
| Ma xusuusto | | 1 | 1 |
| **Wadarta Guud** | **18** | **21** | **39** |



## 5.9 Caqabadaha Dhaqanka

### 5.9.1 Aragtida haweenka ee xirfadda warbaahinta

Daraasadu waxay muujinaysaa isku dheelitir guud oo ay haweenku Kari karaan iney matalaan xirfadaha warbaahinta gudaheeda, weli waxaa jira fikrado qallafsan oo xun-xun.

Fikrado kala duwan ayaa laga soo xigtay mawduuca 'Haweenka ku jira Xirfadaha Warbaahinta'. Kuwo iyagu ka mid ah qaybta, 28% (n = 148 Dh= 29%, L= 71%) waxay aaminsan yihiin in ama ay tahay arrin wanaagsan in haweenku ka shaqeeyaan qaybta. Jawaabeyaasha lab iyo dheddig labaduba waxay kordhiyeen fikradda ah in haweenka iyo ragga ay abuur siman yihiin, inkasta oo ay awooddooda kala duwan tahay, haddana warbaahintu waa xirfad loo heli karo in labada jinsiba ay isku si uga wada shaqayn karan. Inta badan 76% (Dh = 46%, L = 54%) ayaa taageeray aragtidan. Si kastaba ha noqotee, 5% jawaabeyaasha, oo badanaaba lab ah, waxay aaminsan yihiin in saxaafaddu aysan ahayn xirfad ku habboon haweenka. Warbixinaha muhiimka ah waxay dhiibeen jawaab-celin isku dhafan. Dadka badankood (84%) waxay u heellan yihiin oo garab taagan yihiin saxafiyiinta haweenka; 1 warbixinaha muhiimka ah ayaa sheegtay in haweenku ay ka fiicanyihiin ragga. Qaar kale waxay muujiyeen sida ay ugu faraxsan yihiin inay arkaan haween badan oo ku biiraya warbaahinta. 1 (n = 19) wakiil urur wuxuu rumeysan yahay in haweenku naftooda mararka qaarkood ay qabaan kalsooni darro, sababtoo ah ma rumaysna inay u hawlahooda u gudan karaan sida asxaabtooda laboodka. Marka loo eego, waxay u baahan yihiin waxyaabo badan oo taageero qalbidhis ah.

# 6 Gabagabo iyo Talooyin



Natiijooyin kala duwan, sida lagu sharxay hoos, ayaa laga soo qaadan karaa daraasaddan. Talooyin wadajir ah ayaa sidoo kale la soo saaray si gacan loo siiyo dadaalladii hore, ama hadda socda ee lagu taageerayo horumarinta warbaahinta xasaasiga ah ee jinsiga. Inkasta oo liistadani aysan ahayn mid dhamaystiran, waxa la soo jeediyay in daneeyayaasha muhiimka ah ay tixgeliyaan qaar ama dhamaan talooyinkan si loo kobciyo loona xoojiyo dadaalka hadda jira.

| Gabagabo | Talooyin |
|---|---|
| **Wakiilka Jinsiga**<br>Guud ahaan, haweenku si aad ah uma muuqdaan markii aanu ka hadlayno warbaahinta Soomaaliyeed oo hadda ka dhigan 22% tirada guud ee saxafiyiinta Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, iyo Garoowe. Isku dheelitir la'aanta jinsiga ayaa muujinaysa in qaybaha warbaahinta Soomaaliyeed laga sooco kala duwanaanshaha xirfadaha iyo aragtida ay haweenku yeelan karaan ama ay dhiiban karaan. Waxa kale oo ay ka dhigan tahay in laga mamnuuco haweenka xaqa iyo xuquuqda ay u leeyihiin shaqada iyo ka qaybgalka warbaahinta heerkaasa. | |



| Gabagabo | Talooyin |
|---|---|
| **Xaqiiraadda Guulaha Haweenka**<br>• **Wakiilada jinsiga ee go'aan gaarista**<br>Geedi socodka go'aan qaadashada warbaahinta Soomaaliyeed waa mid aad u culus, oo ay xilalkeedu gacanta ku hayaan ragga. Tirada yar ee haweenka warbaahinta ayaa ah heerka ugu hooseeya ee qaab dhismeedka ururrada. Tani waa dhibaato maxaa yeelay, sida daraasaddu muujinayso, balanqaadka qeexaya maamulka in ay ku daraan haween badan oo ku jira ururradooda aysan keenin wax isbedel ah. Shaqo-qoristu, tusaale ahaan, maaha mid loo maro guddiyo laakiin inta badan waa mas'uuliyadda aan xaddidnayn ee maaraynta raggu u badan yihiin. Haddii aan la xakameynin, qaab dhismeedka aan xakamaha lahayn laga yaabo in loo arko si caadiga ah, sababtoo ah dhaqanka; dumarka ma heli karaan fursad ay ku dhacsadaan xuquuqdooda iyo awoodda ay u leeyihiin go'aan qaadashada. Waxa kale oo ay u badan tahay in go'aamiyeyaashu ay sii wadaan inay ku dabbaqaan fikradaha ragga ee caqabadaha ku ah dumarka, taasoo lumineysa faa'iidooyinka aragtida Jinsiga. | • Kor u qaadida wacyigelinta qiimaha go'aaminta wadajirka ah iyo muhiimadda aragtida haweenka. Milkiilayaasha warbaahinta iyo maamulayaashu waa inay fahmaan muhiimadda isdhexgalka iyo kala duwanaanta hoggaanka fikirka ee qaab-dhismeedkooda.<br>• Tan waxaa lagu gaari karaa iyada oo loo marayo tababaro lagu beegsanayo milkiilayaasha warbaahinta iyo maamulayaasha.<br>• In la furo wada-hadallo ku saabsan arrimaha jinsiga iyo warbaahinta iyada oo loo marayo shirarka quraacda, kulannada naadiyada, iyo / ama qoraallo kooban oo loogu talagalay milkiilayaasha iyo maamulayaasha warbaahinta ayaa sidoo kale caawini kara hirgelinta go'aaminta xasaasiga ah ee jinsiga ee qaybta warbaahinta. |
| • Waxaa ka mid ah haween badan oo ka tirsan jagooyinka go`aan-qaadashada oo tusinaya in loo baahan yahay kaalinta haweenka iyo hoggaaminta, gaar ahaan asxaabtooda kale ee dumarka.<br>• Tani waxay saameyn ku yeelan doontaa dhisidda xirfadaha hoggaanka ee qaybta, dhiirigelinta xirfadaha hoggaaminta, yareeynta dhaleeceynta dhaqanka iyo fikradaha qaladka ah, iyo u soo jiididda dumarka badan xagga warbaahinta. | |

## Gabagabo

- Waxaa jira farqi jinsi ah marka la eego guul-gaarka waxbarashada ee xirfadda saxaafadda. Ragga ayaa u muuqda in ay aqoon badan yihiin, oo laga yaabo inay sababtu tahay heerka sinnaan la'aanta ee Soomaaliya, oo ah dal uu tobanaano sano dagaal sokeeye ka socday. Haweenku waxay galaan xirfado kala geddisan, oo ay ka mid tahay warbaahinta, iyada oo aan wax faa'ido ah lahayn maadaama ayan u riyaaqin faa'iidooyinka waxbarashada iyo shaqada, sida ku cad warbixinta EU-da ee ku saabsan jinsiga Soomaaliya. Daraasaddan ayaa lagu ogaaday in dumarka saxafiyiinta intooda badan aysan awoodin inay gaaraaaan heerka tacliinta jaamacadeed, taasoo ka soo duwan marka loo eego ragga ka shaqeeya saxaafadda.

## Talooyin

- Daneeyayaashu waxay noqon karaan kuwo si gaar-gaar ah ama si wadajir ah u siiya kaalmo ku filan oo loogu talagalay haweenka si loo hubiyo in haweenku gaaraan heerarka ugu sarreeya ee waxbarashada.
- Xarumaha warbaahintu waa inay joojiyaan takoorka ku salaysan haweenka waxbarashadooda iyo shahaadooyinkooda, taas beddelkeedana ku dhiirrigeliyaan inay sii wadaan haweenku waxbarashadooda iyagoo shaqeynaya, ama tabar in lagu siiyo xarumaha shaqada si ay awood ugu helaan in ay gaaraan heerarka waxbarashada ee ragga saaxiibbadooda ee la shaqeeya.

### Siyaasadaha iyo Habsocodyada

Mid ka mid ah gaabiska ee aan dhamaystirnay ee lagu qeexay daraasaddan ayaa ah isticmaalka warbaahinta habka aan rasmiga ahayn ee shaqo-qorista. Jiritaan la'aanta, sharciyo qoran, nidaamyo iyo habraac ku salaysan mabaadi'da dareenka jinsiga ayaa keeneysa in habraaca shaqo-qorista uu noqdo mid u furan oo u nugul ujeeddada takoorka. Daraasadani waxay muujineysaa in nidaamka shaqaalaynta badanaa laga tagay si ay u go'aamiyaan maamulka iyo milkiilayaasha warbaahinta.

Maqnaansha guddiyo, iskaba daa kuwa ka hadlaya isu dheelitirnaan fiican ee jinsiga, gacan ka geystaan isu dheelitir la'aanta jinsiga. Siyaasadaha, nidaamyada, iyo gudiyadu waxay hagaajin doonaan xirfadlennimada xarumaha warbaahinta iyo guud ahaan warbaahinta, iyagoo kor u qaadaya hannaanka hufan iyo

- Taageeridda horumarinta siyaasadaha shaqo-qorista ee heerarka iyo siyaasadaha kale ee jinsiga ee xasaasiga ah iyo buug-gacmeedka, iyada oo loo marayo dhisidda awooda hay'adaha iyo iibsashada maareynta warbaahinta iyo milkiilayaasha. Tani waxaa lagu sameyn karaa guriga dhexdiisa waxaana loo diyaarin karaa xarumaha warbaahinta gaarka ah.
- Ururrada warbaahintu waxay sidoo kale horumarin karaan xeerarka anshaxa xubinnimadooda iyo horumarinta siyaasado guud oo lagu dabbaqi karo xarumaha warbaahinta gaarka ah hadba sida loogu baahan yahay.
- Soo bandhigidda guddida shaqaalaynta jinsiga dhammaan iyo ficil kalsooni leh oo sare loogu qaado tirada haweenka si ay kaalinno ugu yeeshaan go`aan-qaadashada



## Gabagabo

istaraatiijiyadda halkii ay go'aanno gaar ahaaneed ka gaari lahaayeen. The absence of these policies in the Somali media may contribute to the discontent and cases of sexual harassment recorded by this study. Maqnaanshaha siyaasadahan ee warbaahinta Soomaaliyeed ayaa laga yaabaa inay gacan ka geysato dareen-xumada iyo falal-dembiyeedyada fara-xumeynta ee diiwaangelisay daraasaddan. Mar haddii ay tahay, siyaasadahani waa inay awoodaan inay wax ka qabtaan ilaha kala duwan ee laga cabanayo, iyagoo xusaya in maamulku uu si caddaalad ah u dhaqmo marka uu shaqada cid ka eryayo.

## Talooyin

- Hagaajinta heerka saxafiyiinta gabdhaha ah si ay u diyaariyaan inay qaataan jagooyinka hoggaamineed.

### Badbaadada iyo Amniga

Badbaadada iyo amniga ayaa ah arrimo muhiim ah, gaar ahaan xarumaha warbaahinta ee fadhigoodu yaay Muqdisho. Saxafiyiinta ayaa tilmaamaya in khatarta iyo hanjabaaduhu ay aad u sarreeyaan markii la joogo goobta shaqada, iyo in aysan jirin tallaabooyin gaar ku ah jinsiga marka laga reebo hababka guud ee badbaadada iyo aminga. Kuwani kuma filna haddii warbaahintu rabto iney soo jiidato dumar badan oo saxafiyiin ah.

- Taageeridda qorshe hawleedka iyo hawlgalka oo ku saabsan baahida haweenka iyo ragga labadaba, si loo hubiyo in farsamooyinka ka hortagga iyo jawaabaha oo dhamaystiran si fudud loo heli karo dhammaan warbaahinada iyadoon loo eegin xaaladaha amniga ee hadda jira. Tani waxay noqon kartaa maalgelinta difaaca, tababarka, xirmooyinka degdega ah ee dawwoyinka oo ka tarjumaya baahida caafimaadka taranka ee haweenka, iyo heerarka goobaha shaqo ee nabdoon, meelo ammaan ah

### Dhibaateynta Galmada

Hanjabaadda galmada waa sababaha walaaca warbaahinta Soomaaliyeed. Daraasadu waxay waxay shaaca ka qaadday in 56% dadka soo jawaabay ay la kulmeen dhibaateyn jinsi ah, iyadoo 32% dumar ah ayaa ayaaiyaguna ka warbixinaya in asxaabtoodu la kulmeen dhibaateyn xagga jinsiga ah, oo badanaaba ay u gaysteen madax sarsare iyo kuwa la shaqeeya.

- Taageerid si kor loogu qaado wacyigelinta dhammaan warbaahinta waa lagama maarmaan haddi la rabo in si wax ku ool ah loo wajaho arrimaha dhibaataynta.
- Taageerid horumarinta iyo kobcinta siyaasadaha jinsiga ee ka hadlaya dhibaataynta galmada.
- Hababka xisaabtanka si ay u ilaaliyaan siyaasadaha iyo in la hubiyo in tallaabooyinka loo qaado si wax looga qabto xadgudubyada.

| Gabagabo | Talooyin |
|---|---|
| 20% jawaab bixiyayaasha (28% haweenka) ayaa sheegay in ayan waxba samayn doonin haddii ay ku dhacdo dhibaateyn caynkan ah, iyagoo u baqaya nabadgelyadooda iyo shaqadooda. Ma jiraan wax farsamooyin adag ah oo jira si looga jawaabo dhibaateynta galmada ee xarumaha warbaahinta. Meelo badan, dhibaataynta galmada waa mawduuc xasaasi ah oo aan laga hadlin, kuwa xadgudubka geystay waxay ka baqaan inay kashifmaan waxayna sameeyaan xeelado si ay u badbaadiyaan shaqadooda.<br><br>Waa caqabad weyn oo ku gudban horumarka haweenka ee warbaahinta iyo. Sidoo kale waa nooc ka mid ah xadgudubka awoodda sheegashada. | Tallaabooyinkan waa in ay ku jiraan qaababka warbixinta, maaha cabsi gelin dhibbanaha ah ama gardarro.<br>• Tallaabooyin lagu taageerayo isbedelka dhaqanka dembiileyaasha. |
| **Waaxda Shaqaalah**<br>Fasaxa dhalmada iyo fasaxa aabanimada - waxay u muuqataa inuu jiro farqi aqooneed ee saxafiyiinta dhexdooda marka la eego sharciyada fasaxa umusha. Inkastoo ay u muuqato in la isku raacsan yahay in sharciyadaan ay jiraan, haddana waxaa muuqata inayan aad u caddayn ama hufnayn. Qaar ka mid ah suxufiyiinta ayaa sheegay in nidaamyadu ay jireen, laakiin waxaa jiray aragtiyo kala duwan oo ku saabsan muddada ama waqtiga. Inkastoo qaar ka mid ah jawaabeyaasha ay sheegeen in fasaxa umusha uu ahaa waajib sharci ah, qaar kalena ay sheegeen in la siiyay go'aamintiisa maamulka iyadoo muddada lagu qeexay saddex bilood, afar bilood, laba bilood, 40 maalmood, iwm. Tani waxay muujineysaa baahida loo qabo in macluumaad wacyigelin ah loo fidiyo saxafiyiinta, iyo sharciyada Xafiiska Waaxda Shaqaalaha oo aan si fiican loo fahmi karin ama aan la heli karin. | |



| Gabagabo | Talooyin |
|---|---|
| **Farqiga Mushaharka Jinsiga**<br>Daraasadani ma awoodi karin iney xaqiiso jiritaanka farqi u dhexeeya mushaharka jinsiga ee warbaahinta Soomaaliya, iyada oo inta badan jawaabeyaasha ay ku adkeysteen jiritaanka miisaaniyadda mushaharka. Si kastaba ha ahaatee, iyada oo dumarku ay ka badan yihiin ragga, oo ay haystaan jagooyinka awoodda iyo go'aan qaadashada, Waxaa la saadaalin karaa in, guud ahaan, mushaharka raggu ka badan yahay kan dumarka. Farogelinta mushaharka jinsiga ayaa si joogta ah u adkaata si loo fahmo, iyadoo heshiisyada iyo heerarka mushaharka laga wada hadlayo albaabada oo xiran. Sidaas awgeed waa adag tahay in la ogaado farqiga iyada oo aan la helin liiska shaqaalaha ee mushaharka lagu bixiyo. | • Taageeridda horuumarinta xirfad ahaan ee waaxda shaqaalaha si loo xaqiijiyo sinnaanta jinsiga ee mushaharooyinka. |
| **Tababarka Jinsiga**<br>Daraasada waxay na tusaysaa in badi saxafiyiinta, labadaba haween iyo rag, aysan tababar qaadanin oo jinsiga ah ama muhiimada ay leedahay sinnaanta jinsiga ee shaqadooda. Tababarkani waa muhiim waana lagama maarmaan, si loo xoojiyo xarumaha warbaahinta waxna looga qabto sinaan la'aanta jinsiga ku salaysan iyo in la joojiyo fikradaha dhaqan / bulsheed. | • Taageerid tababar wacyigelinta asaasiga ah ee suxufiyiinta, ha ahaato mid gudaha ah ama mid dibadda ka ah oo siminaaro isku dhafan ah.<br>• Taageerida tababar heerka dhexe ilaa maareynta sare oo leh fikrad ballaaran oo ku saabsan jinsiga iyo faa'iidooyinka ku salaysan sinaanta jinsiga. |

# 7 Lifaaqa

1. Falanqaynta Xogta
2. Su'aalaha sahanka
3. Wareysiga Warbixinta Muhiimka ah/Su'aalo-waydiin - Hage
4. DKD (Doodda Kooxda Diiradda)/Hage



# XASUUS QOR

# XASUUS QOR

EAN 9788792209870

FOJO: MEDIA INSTITUTE
Linnæus University

"Machadka Warbaahinta FOJO waxaa uu taageeraa warbaahinta xurta ah, madaxbanaan ee xirfadleyda ah ee dunida, taas oo uu ku taageero mashaariic horumarineed heer hoose, heer qaarad iyo heer qaran"

Somali Women Journalists S.W.J

Cilmi baaristan waxaa sameeyey ururka Saxafiyiinta Gabdhaha Soomaaliyeed ee SWJ oo gacan ka heleysay hay'adaha IMS-Fojo ee fulinaya Barnaamijka horumarinta Warbaahinta Soomaaliyeed.

**Email:** swj12013@gmail.com/ info@swj.so

**Web:** http://swj.so/

EMBASSY OF SWEDEN

Nairobi

Daabacaadda buuggan waxaa lagu suurto galiyey taageerada dowladda Sweden.

ims INTERNATIONAL MEDIA SUPPORT

**IMS** waa urur caalami ah oo ka shaqeeya horumarinta warbaahinta caalamka, wuxuuna ururada warbaahinta gudaha kala shaqeeyaa sidii ay u suurto galin lahaayeen hanaan lagu yareeyo colaadaha, lagu dhiiri galiyo dimoqraadiyadda, laguna abuuro jawi wadahadal.

Waxaa lagu daabacay Kenya, waxaana Soomaaliya ku qeybinaya IMS-FOJO. Machadka Warbaahinta FOJO iyo Hay'adda Caalamiga ah ee caawinta Warbaahinta (IMS) waxaa ay si wadajir ah u fulinayaan Barnaamij diiradda saaraya qeybo badan oo ka mid ah caqabadaha ay wajahayaan warbaahinta Soomaaliyeed si loogu suurto galiyo in ay hormuud ka noqdaan nabadda, dib u heshiisiinta, isla xisaabtanka iyo xaquuqda muwaadiniinta.

**Fojo.se | mediasupport.org | facebook.com/IMSFojoSomalia/**